



Bridging Refugee Youth & Children's Services

This document is provided by the BRYCS Clearinghouse.

Educational Handbook for Refugee Parents

International Rescue Committee

Reproduced with permission of International Rescue Committee

New York, NY

© 2006



BRYCS is a project of the United States Conference of Catholic Bishops/Migration and Refugee Services (USCCB/MRS)
1-888-572-6500/ info@brycs.org / www.brycs.org



Bridging Refugee Youth & Children's Services

This document is provided by the BRYCS Clearinghouse.

Educational Handbook for Refugee Parents

International Rescue Committee

Reproduced with permission of International Rescue Committee

New York, NY

© 2006



BRYCS is a project of the United States Conference of Catholic Bishops/Migration and Refugee Services (USCCB/MRS)
1-888-572-6500/ info@brycs.org / www.brycs.org



Bridging Refugee Youth & Children's Services

This document is provided by the BRYCS Clearinghouse.

Educational Handbook for Refugee Parents

International Rescue Committee

Reproduced with permission of International Rescue Committee


New York, NY

© 2006



BRYCS is a project of the United States Conference of Catholic Bishops/Migration and Refugee Services (USCCB/MRS)
1-888-572-6500/ info@brycs.org / www.brycs.org

experience. ~~success~~
education ~~on.~~ ~~1~~ the
cated. ➤ the theory
tion about or train-
education) informal /
theoretical knowledge
and skills.



Educational Handbook for Refugee Parents

Gacan-qabsi Waxbarasho ee Waalidka Qaxootiga ah

**Gacan-qabsi Waxbarasho ee Waalidka
Qaxootiga ah**

Waxa soo-saaray International Rescue Committee © 2006



Mahad-naq

Qaybo ka mid ah waxyaabaha ku jira gacan-qabsigan waxa laga soo qaataay Gacan-qabsiga Waalidka Dugsiyada Madaxa-banaan ee Boise oo ay qoreen Dr. Ann Farris iyo Molly Jo de Fuentealba, M.Ed.

Mahad-naq gaar ah waxay ashkhaasta soo socda ku mutaysteen tixgelintoodii iyo taageeradoodii muddadii la samaynayey gacan-qabsigan: Dr. Ann Farris, Sue Fornander, Diane Goicoechea Price, Colleen Krause, Brenda Bednar, Beatrice Uzemureba, Akuot De Dut, Carla Sandine, Cara Winters iyo Kristy Gladfelter.

Mahad-naq gaar ah iyana waxa leh shaqaalaha xafiisyada dib-u-dejinta ee soo socda kaalmadoodii baadhitaanka loo galay gacan-qabsigan: Leslye Boban iyo IRC Boise; Susan Donovan, Mirna Dickey iyo IRC Charlottesville; Ellen Beattie, Spencer Hall, Chris Morris iyo IRC Atlanta.

Jadwalka Tusmada

I. Xuquuqda iyo Xilka Waalidka ee Waxbarashada	1
II. Habka Dugsiyada Ameerika.....	4
1. Halkee carruurtu u tagaan dugsiga?	4
2. Maxay carruurtu ku bartaan dugsiga hore?.....	4
3. Maxay carruurtu ku bartaan dugsiga baraarujinta?	5
4. Maxay carruurrt ku bartaan dugsiga hoose?.....	5
5. Maxay carruurtu ku bartaan dugsiga dhexe iyo Dugsiga Sare ee hore? .	6
6. Maxay carruurtu ku bartaan dugsiga sare?	7
7. Maxay Carruurtu ku bartaan kulliyadda?	9
8. Haddii ilmahaygu dhammaysan waayo dugsiga sare?	10
9. Haddii aan fahmi waayo wuxuu ilmahaygu baranayo?	10
10. Mar-mar, waxaan dareemaa in dugsigu ilmahayga baro waxyaabo aanan raali ka ahayn. Maxaan samayn karaa?	10
11. Sidee dugsigu ilmahayga uga caawin karaan barashada Ingiriisida? ..	12
12. Muxuu dugsigu samayn karaa haddii ilmahaygu u baahan yahay baahi gaar ah?.....	12
13. Muxuu yahay Qorshaha Taclinta ee Qofaysan (IEP)?	13
14. Ilmahaygu waa fahan badanyahay, ma jiraan fasalo gaar ah oo uu qaadan karaa?.....	13
III. Jadwalka Dugsiga iyo Maalmaha Dugsiga	14
1. Goorma ayey carruurtu tagaan dugsiga?	14
2. Goorma ayey carruurtu guriga joogaan oo dugsiga ka joogaan?.....	14
3. Sidee ayey carruurtu u tagaan dugsiga?	15
4. Maxay carruurtu qadada cunaan?	15
IV. Nidaamka Dugsiga	16
1. Maxay tahay xaashida xidhiidhka ee xaaladda degdega ah?	16
2. Sideen u codsan karaa turjumaan?	17
3. Goorma ayuu ilmahaygu jirro uga magnaankaraa dugsiga?	18
4. Haddii uu ilmahaygu jirro u tagi kari waayo dugsiga?	18
5. Haddii uu ilmahaygu u baahan yahay daawo inuu ku qaato dugsiga?...	19
6. Haddii ilmahaygu ku jirrado dugsiga?	19
7. Haddii ilmahaygu ka daaho dugsiga?	20
8. Maxaan samayn karaa haddii ilmahaygu leeyahay ballan dhakhtar oo la rabo inuu hore uga soo baxo dugsiga?	20
9. Ma aadi karaa ilmahayga dugsigiisa?	20
10. Maxay yihiin waraaqaha la iiga soo diraa dugsiga?	21
11. Maxay tahay xaashida warbixintu?.....	22
12. Sidee ayey macalimiintu ku xushaan derejada?	23
13. Maxay yihiin warbixinada horumarku?	23
14. Ma jiraan wax la rabo inaan baxsho dugsiga?	23
15. Yaan la hadlaa haddii aan su'aalo qabo?	24

Jadwalka Tusmada


V. Ka-qayb-qaadashada Waalidka.....	25
1. Sideen u dejiyaa filaanshaha ilmahayga ee shaqada dugsiga?	25
2. Maxay tahay hannuunin?	26
3. Maxay yihiiin shirarka wallid-macalinku?	27
4. Maxay yihiiin waxqabadyada dugsiga kadib?	29
5. Maxay yihiiin xafladaha dugsigu?	31
6. Ilmahayga guriga ma ku caawin karaa?.....	31
7. Sideen ilmahayga uga caawiyyaa shaqada guriga haddii aanan si fiican ugu hadal Ingiriisida?.....	32
8. Maxay yihiiin waxa kale ee aan ku caawin karaa ilmahayga si uu u noqdo arday fiican?.....	34
VI. Qawaaniinta Dugsiga iyo Anshaxa.....	36
1. Muxuu ilmahaygu ugu hogaansamayaa qawaaniinta?	36
2. Maxaa dhacaya haddii uu ilmahaygu u hogaansami waayo qawaaniinta?	36
3. Maxaa ka mid ah qawaaniinta dugsiga?	36
4. Maxay yihiiin waxyabaha mamnuuca ahi?	37
5. Maxaa kale ee aan la ogolayn?.....	38
6. Sideen ku ogaanayaa haddii ilmahaygu jabiyeey qawaaniinta?	39
7. Maxay tahay tallaabada anshaxu?	39
8. Muxuu yahay wakhtiga dibeddu?	39
9. Maxaa dhaca marka ay maclimiintu xayuubiyaan mudhaanta?	40
10. Maxaa dhaca marka ilmaha loo diro xafiiska maamulaha?	40
11. Muxuu yahay xayiraad?.....	40
12. Maxay tahay joojintu?	40
13. Maxay tahay cayrintu?	41
VII. Isku-diyaarinta kulliyadda	42
1. Waa maxay kulliyad?	42
2. Ilmahaygu ma u baahan yahay inuu tago kulliyad si uu shaqo u helo? . 42	42
3. Maxay kulliyaddu u tahay muhiim?	43
4. Sidee ilmahaygu kulliyad u dalban karaa?	43
5. Maxay tahay shahaadadda dugsiga sare?	43
6. Maxay yihiiin dhibcaha SAT iyo ACT?	44
7. Muxuu yahay qoraalka tusaalah ahi?.....	44
8. Waa immisa ujrada dalabku?	45
9. Maxa dhacaya markuu ilmahaygu waraaqaha u-diro kulliyadda?	45
10. Maxay waaxda ogolaanshuhu ka eegaan dalabka?	46
11. Maxa dhacaya haddii ilmahayga loo ogolaado inuu galo kulliyadda? .. 46	46
12. Sidee ilmahaygu ku xulan karaa kulliyadda saxa ah?	46
13. Waa maxay qiimaha kharashka kulliyaddu?	47
14. Sidee ayaanu isaga bixin karnaa kulliyad?	48
15. Maxay tahay deeq ama deeq waxbarasho?	48

Jadwalka Tusmada

16. Maxay tahay shaqo waxbarasho?	48
17. Maxay tahay amaah?.....	49
18. Sidee ayuu ilmahaygu ku helayaa gargaar dhaqaale?	49
19. Sideen u bilaabaa kala hadalka ilmahayga kulliyadda?.....	50
Tallaabooyinka Buuxinta FAFSA.....	52
Financial Aid Checklist	52
VIII. LIFAAQYADA: IS-GAADHSIINTA	55
1: Codsiga Turjumaan	56
2: Codsiga Turjumaan (waraaq)	58
3: Codsiga La-kulanka Macalinka/Shaqaalaha Dugsiga	60
4: Cudurdaarka Maqnaashaha	62
5: Cudurdaarka Maqnaanshaha (waraaq)	64
6: Ilmaha Buka ee u Baahan inuu Dugsiga ku qaato Daawo	66
7: Cudurdaarka Daahidda.....	68
8: Cudurdaarka Daahidda (waraaq).....	70
9: Hore u sii-dayn	72
10: Codsiga dhaafitaan ama qado bilaash ah	74
11: Codsiga Gargaarka Qoyska Baranaya Ingiriisida	76

1. Xuquuqda iyo Xilka Waalidka ee Waxbarashada

Waalidku waxay xaq u leeyihii in ay:



Ogaadaan sida
ilmahoodu ku
yahay dugsiga



Ogaadaan
barnaamijyada
dugsiga iyo
dhaqdhaqaqya
da caawin kara
ilmahooda



Kala kulmaan
macalimiinta
shaqada dugsiga
ee ilmahooda



Ogaadaan
haddii uu
ilmahoodu galoo
rabshad
dugsiga iyo sida
uu ka yeelayo
dugsigu



Ogaadaan waxa
uu ilmahoodu ku
baranayo dugsiga



Tagaan shirarka
dugsiga



Weydiistaan
dugsiga gargaar
haddii ilmahu dhib
ku qabo xagga
aragga, maqalka
ama barashada
casharada dugsiga



Helaan gargaar
la hadalka
macalimiinta
ilmahooda

Xuquuqda iyo Xilka Waalidka ee Waxbarashada



Gartaan
waraaqaha
dugsiga
macnahooda
intaanad saxeexin



Codsadaan in
laga dhaafo
ama bilaash
lagu siiyo
qadada haddii
aanay haysan
lacag

Waalidku waxay MAS'UUL ka yihiin:

Hubinta in ilmahaagu tago dugsiga maalin kasta, haddii aanu bukin.



Marka ilmahaagu buko, ha u dirin dugsiga. Guriga ku hay.

Marka ilmahaagu buko, waa inaad u wacdo dugsiga. U sheeg xoghaynta dugsiga in aanu ilmahaagu imanayn.

Hubinta in ilmahaagu qabto shaqo-guriyeedka maalin kasta.



Hubi in ilmahaagu:

Yahay nadiif



Cunto cuno



Xidho dhar
nadiif ah



Si fiican u
seexdo



Xuquuqda iyo Xilka Waalidka ee Waxbarashada

Hubinta in ilmahaagu fahmo sida uu ugu dhaqmaya dugsiga ee ugu hoggaansamayo qawaaniinta uu dejiyo macalinku.



Caruurtu
waxay is-
taagan saf oo
wada-jir u
wada-socdaan
dugsiga



Caruurtu
waxay
dhagaystaan
macalinka oo
sameeyaan
wuxuu u
sheego



Caruurtu
gacanta ayey
taagaan si ay u
hadlaan



Caruurtu
dugsiga waxba
kama xadaan



Caruurtu ma
diriraan waxna
cid kuma
dhufaan



Caruurtu ma
handadaan
caruurta kale



Caruurtu ma
adeegsadaan
erayo xun



Caruurtu waa
wada
shaqeeyaan



Caruurtu kama
daahaan
fasalka
wakhtigiisa



Caruurtu waa
dhameeyaan
shaqada
guriga oo dib
ugu celiyaan
dugsiga

II. Nidaamka Dugsiga Ameerika



Ilmo kastaa xaq buu u leeyahay inuu dugsi tago. Qofna kuuma sheegi karo adiga iyo caruurtaada midna in aysan tegi karin dugsiga dadweynaha ee hoose, dhexe, sare hore, ama dugsiga sare.

1. Halkee caruurtu u tagaan dusiga?

Waxa jira dugsiyada caruurta da'da kala duwan. Waa kuwan noocyada dugsiyadu:

- Dugsiga baraarujinta
- Hoose
- Dugsiga dhexe iyo dugsiga sare ee hore
- Dugsiga sare
- Kulliyad
- Dugsiga xirfadda

Dugsiyada waxay noqon karaan qaar dadweyne ama gaar. Dugsiyada dadweynuhu waa lacag la'aan. Dugsiyada gaarka ahi waa qaali lacag badan.

Carruurtu waxay dugsiga ku bartaan waxyaboo cusub sannad kasta. Carruurtu waxay qaataan casharro ama maaddooyin. (Maaddadu waa eray kale oo ah fasalka). Carruurta yaryari waxay qaataan dhawr fasal. Carruurta waaweynina waxa qaataan kuwa ka sii badan.

Carruurtu waxay qaadan karaan casharro isku mid ah sannad kasta, laakiin sannad walba casharradu waa sii adkaadaan.tusaale ahaan, carruurta yaryari waxay bartaan xisaab sahlan, sida $5 + 0 = 5$. Kuwa waaweynina xirfado ka adag, sida aljabraha $5x + 10 = 5$.

2. Maxay caruurtu ku bartaan dugsigada hore?



Dugsiga hore waxa taga carruurta da'da 3 ama 4 jirka ah. Dugsiga hore waxay caruurtu ku bartaan sida loogu hoggansamo qawaaniinta dugsiga. Carruurtu waxay ka qayb-qaataan dhaqdhaqaqyo ka caawin

Nidaamka Dugsiga Ameerika

doona siday u baran lahayeen akhriska, qorrida, fahamka iyo ku-hadalka Ingiriisida. Dugsiga hore looma baahna oo ma aha inuu ilmo kastaa tago dugsiga hore.

3. Maxay caruurtu ku bartaan dugsiga baraaruujinta?

Baraaruujinta waxa taga da'da 4 ama 5 jirka ah. Baruuruujintu waa 5 maalmood usbuucii. Dugsigani waxa la tagaa maalin dhan ama maalin badhkeed. Dugsiga baraaruujinta, macalimiintu waxay ardayda ka caawiyaan xirfada aasaaska u ah akhriska iyo anshax wanaaga. Anshax wanaaga waa marka carruurtu u hoggaansom qawaaniinta dugsiga. Dhamaadka baraaruujinta, carruurtu waxay baran ABC-da, lambarada iyo midabyada.




4. Maxay carruurtu ku bartaan dugsiga hoose?



Dugsiga Hoose waxa taga carruurta da'da 5, 6, 7, 8, ama 9 jirka ah. Carruurtu waxay tagaan dugsiga shan maalmood usbuucii. Dugsiga hoose wuxuu yeelan karaa shaqo-guri. Taas oo ah shaqo la rabo in ay ku qabtaan guriga. Dugsiyada hoose waa lacag la'aan.

Dugsiga hoose, carruurtu Ingiriisida iyo xisaabta ayey bartaan maalin kasta. Waxa kale oo ay bartaan sida loo akhriyo ee loo qoro.



Ilmaahu wuxuu baran doonaa macnaha lambarada iyo sida loo isticmaalo maalin kasta.

Dugsiga hoose labo illaa 5 jeer usbuucii waxa lagu bartaa:

Caafimaad. Caafimaadku waa sida jidhka si fiican loogu dhawro. Waa waxa la cuno iyo sida loo caafimaad qabo ee aan loo bukoon.



Sayniska. Saynisku waa sida wax u shaqeeyaan.

Aqoonta bulshada. Aqoonta bulshadu waa aqoonta taariikhda, juqraafiga, diinta iyo dadka.

Mar ama laba jeer usbuucii dugsiga hoose, carruurtu waxay tagaan:

Nidaamka Dugsiga Ameerika

Farshaxan.

Casharka
farshaxanka,
carruurtu waxay
ku bartaan sida
loo sameeyo
wax.

Farshaxanku
wuxu ka caawin
karaa kobcinta
xirfadda
dhaqdhaqaqa -
taas macnaceedu
waxay ka anfici
kartaa
qoritaankooda.



Kaydka buugaagta.

Kaydka
buugaagtlu waa
meesha ay
carruurtu ku
dhugtaan
buugaagta.



Jimicsiga ama Aqoonta Jidhka

Jimicsigu waa
wakhtiga
caruurtu
ciyaaraan ee
jimicsadaan.



Muusiq.

Carruurtu waxay
bartaan sida
loogu ciyaaro
aaladaha, loo
heeso ee loo
wada shaqeeyo.



Kaydka
buugaagta,
carruurtu waxay
ku shaqeeyaan
kombuyuutarro.



5. Maxay carruurtu ku bartaan dugsiga dhexe iyo dugsiga sare ee hore?

Dugsiga dhexe ama **dugsiga sare ee hore** waxa taga carruurta da'da 10, 11, 12, 13 or 14 jirka ah. Carrurtu waxay tagaan dugsiga shan maalmahood usbuucii. Carrurtu waxay leeyihiin shaqo-guri. Waa lacag la'aan dugsiyada dhexe iyo sare hore.

Dugsiyada dhexe iyo sare hore, carruurtu waxay ku bartaan:

- Ingiriisi – akhris iyo qoraal
- Caafimaad
- Saaynis
- Aqoonta bulshada
- Luqadaha kale sida Isbaanishka ama Faransiiska
- Muusiq
- Xisaab
- Kombuyuutarada
- Farshaxan
- Jimicsi

Haddii dugsiga sare-hore ku adkaado ilmahaaga, weydii macalinka gargaar dheeraad ah. Waxaad la hadli kartaa la-taliyaha hanuuninta. La-taliyaha hanuunintu waa qof jooga dugsiga oo caawin kara ilmahaaga si uu u noqdo arday fiican. La-taliyaha hanuunintu waxa kale oo uu ka caawin karaa ilmaha isku-diyaarinta kulliyadda ama shaqada.

6. Maxay carruurtu ku bartaan dugsiga sare?



Dugsi sare waxa taga da'da 15, 16, 17, ama 18 jirka ah. Gobolo badan, carruurtu waa in ay tagaan dugsiga illaa 16. Dugsiga sare wuxuu carruurta ka caawiyaan siday u heli lahaayeen shaqo fiican ama u tagi lahaayeen kulliyad. Dugsiyo badan oo sare ayaa lacag la'aan ah.



Waa muhiim in ilmuuhu dhamaysto dugsiga sare si uu shaqo lacag fiican leh u helo. Ilmahaagu waxa kale oo uu u baahan yahay shahaadad dugsi sare si uu u tago kulliyad. Dibloomuhu waa xaashi muujinaysa in ilmahaagu dhamaystay dugsi sare.

Dugsiga sare, waxa jira casharo carruurtu u baahan tahay in ay bartaan. Kuwaas waxa la yidhaa casharrada loo baahan yahay. Ardaydu waa in ay ka gudbaan casharadaas si ay u dhamaystaan dugsi sare. Ingiriisida iyo xisaabtu waa casharro loo baahan yahay.

Dugsiga sare carruurtu waxay xulan karaan casharka ay doonayaan in ay qaataan. Kuwaas waxa la yidhaa casharrada xulka ah.

Nidaamka Dugsiga Ameerika

Dugsiga sare casharradu waxay noqon karaan qaar gundhiih ah iyo qaar sare. Casharada sare waa adag yihiin.

Ardayda dugsiga sare waxay qaadan karaan casharada soo socda:

Suugaan waa
aqoonta
gabayada,
maqaalada,
taariikh nololeed
qof iyo sheeko
dhalanteed




Saaynis waa
aqoonta sida
wax u
shaqeeyaan




**Taariikhda
Ameerika** waa
aqoonta
sheekada
Ameerika



**Taariikhda
Adduunka** waa
aqoonta
sheekada
adduunka



Ganacsi waa
aqoonta
sharikadaha,
maamulka dadka
iyo samaynta
lacagta



Farshaxan waa
aqoonta rinxiga,
sawirka iyo
sawir-qaadidda



**Cilmiga
Bulshada** waa
aqoonta dadka.



**Kombuyutarka
iyo
Maclumaadka
Teknoolajiyada**



Nidaamka Dugsiga Ameerika

Luqadaha, sida
Faransiiska



Tiknolajiyada la
dabakho waa
sida wax looga
shaqaysiyo



**Qoyska iyo
saayniks**
macmiisha waa
sida loo bixiyo
biilasha ee loo
hubiyo in
qoyskaagu
haysto wixii loo
baahnaa




Fasalka 10aad iyo 11aad (marka ilmahaagu jiro 16 ama 17 sanno), wuxu ilmahaagu u baahan yahay inuu qorsheeyo sidii uu ku dhamaysan lahaa dugsiga sare. Ilmahaagu ma tagayaa kulliyad? Ilmahaagu ma shaqo tagayaa?

Shaqooyinka qaar waxay u baahan yihii xirfad. Xirfadu waa wax ilmuu u barto inuu shaqeeyo. Shaqooyin badan ayaa u baahan aqoon jaamicadeed. Adiga iyo ilmahaagu waa inaad ogaataan kulliyadda nooceee ah ayuu ilmahaagu ka baran karaan xirfadda uu u baahan yahay.

La-taliyaha haga ee dugsiga ayaa ka caawin kara ilmahaaga qorshaha shaqada ama kulliyadda. Ilmahaagu wuxuu ka qabsan karaa kulan la-taliyaha haga. Adiguna waad tagi kartaa kulankaas.

7. Maxay carruurtu ku bartaan kulliyadda?

Kulliyad waxa taga dadka dhamaystay dugsi sare ee haysta dibloome. Ardayda kulliyaddu waxay qaataan casharro adag. Waxay bartaan xirfado ay uga baahan doonaan shaqdooda.



Tusaale ahaan, haddii uu arday rabo inuu noqdo dhakhtar, waa inuu ardaygu bartaa saaynis.


8. Haddii aanu ilmahaaya dhammaysan dugsiga sare?

Haddii aanu ilmahaagu dhammaysan dugsiga sare, waxa jira casharro kale oo ilmahaagu qaadan karo.

Casharrada habeenkii waxay carrurta iyo dadka waaweyn tegi karaan shaqada kadib.



Casharrada GED waxa qaata dadka aan dhammaysan dugsiga sare. Casharradu waa habeenkii ama maalintii. GED waa sida dibloomaha dugsiga sare. GED waa muhiim si aad u hesho shaqo fiican ama aad u tagto kulliyad.



Ilmahaagu wuxu qaadan karaa casharro Ingiriisi ah. Haddii aanu ilmahaagu ka-qalin-jabin dugsi sare, barashada Ingiriisidu waxay ka caawin doontaa ilmahaaga si uu helo shaqo lacag fiican leh..

9. Haddii aan fahmi waayo wax uu ilmabaygu baranayo?

Waxaad codsan kartaa in aad la kulanto ilmahaaga macalinkiisa. (Eeg [Lifaaga 3](#) gargaarka codisga kulanka.) Kulankaas macalinka ilmahaaga kala hadal su'aalahaaga iyo dareenkaaga. Weydii macalinka ilmahaaga casharrada iyo fasalada. Xusuusnow in aad dalbato turjubaan haddii aad u baahan tahay mid.

10. Mar-marka qaar waxaan dareemaa in dugsigu baro ilmabayga wax aanan raali ka ahayn. Maxaan sameyn karaa?

Ka la hadal macalinka ilmahaaga casharrada. Marmarka qaar carruurtu ma fahmaan waxay baranayaan. Carruurtu waxay kuu sheegi karaan wax

Nidaamka Dugsiga Ameerika

khalad ah. Macalinka ayaa kuu macnayn kara si aad u saxdo ilmahaaga. Carruurta carruuraha kale wax ayey ka baran karaan. Mar-marka qaar ma fiicna waxyabahaas ay ka bartaan carruurta kale. Waxay baran karaan erayo xun iyo anshax aanad jeclaysan. Waxay ku tusi karaan ixtiraam darro.

Waa kuwan waxyaabaha aad samyn karto:

Ilmahaaga kala hadal dugsiga. Baro ilmahaaga casharradiisa iyo asxaabtiisa.

Ballan ka smayso macalinka si aad uga la hadasho dareenkaaga. Dareenku waa waxyaabaha aad ka werwerto.

U macnee ilmahaaga waxaad ka qabto waxa uu baranayo. U sheeg ilmahaaga erayada iyo anshaxa aanad jeclayn.

TUSAALE:

Wiilkaygii, erayada aad tidhi waa erayo xun. Ma rabo in aad isticmaasho. Waxay noo muujinayaa anshax xumo aniga, hooyadaa iyo walaaladaa. Wuxaan rajeynayaa in aanad isticmaalin.

Xusuusi ilmahaaga qawaaniinta guriga. U sharax sidaad rabto inuu u dhaqmo. U macnee waxa dhici kara haddii uu u hoggaansami waayo.

TUSAALE:

Wiilkaygii, Ma rabo inaad isticmaasho eraydaas. Taasi waa qaunuun. Haddii aad isticmaasho erayadaas lama ciyaari doontid saaxiibadaa.

La kulan ilmahaaga saaxiibadii iyo waalidkooda. Baro carruurtu kuwa anshaxa fiican iyo kuwa anshaxa xun. Waad go'aansan kartaa haddii aad rabto in ilmahaagu la ciyaaro carruurtaas.

Sii ilmahaaga meel nabdoon oo ay ku ciyaraan isga iyo saaxiibadii. Meeshaas waa inuu joogaa qof weyn oo ilaaliya oo saxa anshaxooda.

Nidaamka Dugsiga Ameerika

Waxaad wediin kartaa macalinka haddii uu yaqaan meel nabdoon oo carruurtu tagaan dugsiga ka dib.

11. Sidee dugsigu uga caawin karaa ilmahaaya barashada Ingiriisida?

Haddii ilmahaaga loo arko in Ingiriisiidiisu kooban tahay (oo u baahan yahay casharro Ingiriisi ah), wuxu ilmahaagu heli doonaa qorshe barasho oo qeexaya himilooyinkiisa Ingiriisi, fasalka iyo diyaarinta imtixaanka. Taas waxa la yidhaa Qorshe Tacliineed oo Qofeed (IEP). Taasi waa xaashi waalidku uu eegi rabo oo saxeexayo.

Carruurta baranaysa Ingiriisida waxay qaadan karaan casharrada ESL (Ingiriisi Af-labaad ahaan). Casharrada ESL waxay baraan ardayda sida loo akhriyo, qoro ee loo hadlo. Casharrada qaar ayey ku jiraan xisaab iyo saaynis. Carruurtu waxay bartaan erayada Ingiriisida ee xisaabta iyo saayniska.

12. Maxay dugsiyadu ka qaban karaan haddii ilmahaagu u baahan yahay gargaar dheeraad ah ama qabo baahi gaar ah?

Waxa jira fasalo loogu talo galay carruurta u baahan gargaar dheeraad ah. La hadal dugsiga haddii uu ilmahaagu ka qabo dhib:

Aragga



Socodka



Maqalka




Barashada



Nidaamka Dugsiga Ameerika

Hadalka



Addeecidda qawaaniinta



Waa kuwan waxyaabaha aad saamayn karto haddii ilmahaaga uu ku adkaado aragga, maqalka, hadalka, socodka, brashada ama anshaxa:

- Weydii macalimiinta waxa ay ku caawin karaan ilmahaaga
- La shaqee macalimiinta si aad u caawisaan ilmahaaga
- Dalbo turjubaan haddii aad u baahan tahay mid
- Xafid dhammaan waraaqaha macalinka ilmahaagu ku siiyo

13. Muxuu yahay Qorshaha Tacliineed ee Qofku (IEP)?

Qorshaha Tacliineed ee Qofku waa qorshe macalin iyo waalid u sameeyeen ilmo qabo baahi barasho oo gaar ah. Qorshahu wuxu ifin karaa inuu ilmuu qabo dhib xagga aragga ama maqalka, ama aanu Ingiriisida si fiican ugu hadal. Qorshuhu wuxu sharxayaa waxyaabaha ay dugsiga iyo waalidku qaban karaan si ay ilmaha u siiyan gargaar dheerad ah.

14. Haddii ilmahaygu fahan badanyahay, ma jiraan fasalo gaar ah oo uu qaadan karaa?

Waxa jira casharro loogu talogalay carruurta fahanbadanyahay. Casharadaasi waxay leeyhiin shaqo adag. Kulliyaduhu waxay jecel yihiin ardayda qaadata casharadaas. La hadal macalinka haddii uu ilmahaagu u baahan yahay inuu ku galo fasaladaas.

Jadwalka Dugsiga iyo Maalmaha Dugsiga

III. Jadwalka Dugsiga iyo Maalmaha Dugsiga

1. Goorma ayey tagaan carruurtu dugsiga?

Dugsigu wuxu bilaabmaa Ogost ama Sibtambar. Carruurtu waxay tagaan dugsiga illaa Maayo ama Juun. Maalinta dugsigu waxay noqon kartaa 5 ama 7 saacadood. Dugsigu wuxu furan yahay Isniin, Talaado, Arbaco, Khamiis iyo Jimce. Dugsigu ma furna Sabtida iyo Axada.

Axad	Isniin	Talaado	Arbaco	Khamiis	Jimce	Sabti
	Dugsi	Dugsi	Dugsi	Dugsi	Dugsi	

2. Goorma ayey carruurta ka joogi karaan dugsiga?

Carruurta ma tagaan dugsiga Sabtida iyo Axadda.

Carruur badan ayaan tagin dugsiga xilliga guga. Taas macnaheedu waxay weeye carruurta in aanay dugsi tagin baa laga yaabaa dabayaaqada Juun, dhammaan Juulaay ama bilawga Ogost.

Waxa jira ayaamo gaar ah oo aanay carruurtu tegin dugsi. Ayaamahaas waxa la yidhaa fasax:

Isniinta ugu horreysa Sibtambar, Maalinta Shaqaalaha **DUGSI MA JIRO**
Khamiista 4aad Noofambar, Thanksgiving.... **DUGSI MA JIRO**
Diisambar 25, Kirismas.... **DUGSI MA JIRO**
Janaayo 1, Sannad Cusub.... **DUGSI MA JIRO**
Isniinta 3aad ee Janaayo, Maalinta Martin Luther King Jr. **DUGSI MAJIRO**
Isniinta 3aad ee Febraayo, Maalinta Madaxweynaha.... **DUGSI MA JIRO**
Isniinta ugu danbaysa Maayo, Maalinta Xusuusta.... **DUGSI MA JIRO**



Waxa jiri kara maalmo kale oo aanay carruurtu tegin dugsiga. Dugsiga ayaa kuu soo diri doona jadwal. Jadwalku wuxuu muujiyaa maalamaha aanay carruurtu dugsi tagayn. Eeg tuduca macluumaadka ee jadwalka dugsiga.

Carruurtu waxa laga yaabaa in aanay helin fasaxyo diimeed. Haddii uu ilmahaagu ku maqnaado fasax diimeed, u wac xoghaynta dugsiga. U sheeg xoghayaha inta maalmood ee uu ilmahaagu maqnaanayo iyo magaca fasaxa diinta. Ilmahaagu wuxu u baahan doona inuu soo kabo shaqadii dugsiga.

Jadwalka Dugsiga iyo Maalmaha Dugsiga

Mar-mar dugsiga waa la xidhaa haddii cimiladu xun tahay. Taasi macnaheedu waa carruutaadu ma aadayso dugsiga, ama haddii ay aadan hore ayey u soo noqon. Dugsiga ayaa sameeya go'aanka. Waxay ka naadin raadiyaha iyo TV-ga liistada dugsiyada xidhan ama hore looga soo baxayo. Wuxa kale oo jiri kara lambar aad wici karto si aad u maqasho haddii dugsigu xidhan yahay.

3. Sidee carruurtu u tagaan dugsiga?

Carruurta ku nool dugsiga agtiisu waa lugayn karaan. Carruurta aan lugayn karin waxay qaadan karaan baska. Ardayda oo keli ah ayaa raaci kara baska.



Haddii carruurtaadu baska qaataan, waa inaad ogaato:

- Lambarka baska ...
- Meesha ay carruurtaadu ka fuulaan ee kaga dhaadhacaan baska...
- Wakhtiga ay carruurtaadu fuulaan baska...

Haddii ay carruurtaadu u lugeeyaan baska, hubi in ay wataan dhar ku habboon cimilada. Tusaale ahaan, haddii qaboq jiro carruurtaadu waa in ay xidhaan buudh iyo jaakeet.

4. Maxay carruurtu cunaan qadada?

Caccruurtu guriga waa ka sii qaadan karaan qado. Waxa kale oo ay dugsiga ka iibsan karaan qado. Carruurta dugsiga ka cunta qadadu waxay dooran karaan qado.



Haddii ilmahaaga laga ilaasho cuntada qaar, ama aanu cunin cuntada qaar sababo diimeed, ilmahaagu wuu u sheegi karaa dugsiga oo ay siin doonaan qado kale.

IV. Habka Dugsiga

Dugsiyada waxay leeyihii siyaabo ay wax u sameeyaan. Kuwaas waxa la yidhahdaa habab. Kuwaasi waa habab aad ugu sheegi karto dugsiga haddii ilmo ka daahayo dugsiga, ama aad rabto kulan macalin ama aad codsanayso turjubaan.

Habka dugsigu ilmahaaga ayuu ilaaliyaa. Markaad wacdo dugsiga inaad u sheegto in ilmahaagu buko, waa ogaanayaan meesha uu ilmahaagu jiro. Ilmahaagu wuu nabad qabaa haddii uu guriga kula joogo. Haddii aanay war kaa helin oo aanu ilmahaagu dugsigana joogin, waxay ka dhigan tahay inuu ilmahaagu khatar ku jiro. Aad ayey muhiim u tahay in aad la xidhiidho dugsiga oo aad raacdoo habka dugsiga.

Dugsiga dadka muhiimka ahi waa:

- Macalinka – kala shaqeeya ilmahaaga casharrda
- Xoghayaha –ka shaqaysa xafiiska dugsiga, ka jawaabta telefonka, oo ka jawaabi karta su'aalahaaga
- Maamulaha – oo maamula dugsiga

Sannad dugsiyeed kasta, waa in aad qortaa magacyada macalinka ilmahaaga, xoghayaha iyo maamulaha. Waxa kale oo u baahan in aad ogaato lambarka telefonka dugsiga.

Magaca Macalinka: _____

Magaca Xoghaynta: _____

Telefon lambarka xoghaynta: _____

Iyana waa muhiim in aad buuxiso sannad kasta xaashida cidda lala xidhiidhi karo marka ay xaalad dedeg ahi jirto.

1. **Maxay tahay xaashida xaaladda degdeg ahi?**



Xaashida qofka lala xidhiidhayo xaaladda degdeg ah waxa ku yaala magaca, telfon lambarka qofka dugsigu u wici karo marka xaalad deg deg ahi jirto.

Habka Dugsiga

Qofkaasi wuxu kaa haystaa ruqsad oo ka qaadi karo ilmaahaaga dugsiga. Xaashida xidhiidhka xaaladda degdeg ah waxay gargaartaa sidii ilmahaaga nabad loogu xafidi lahaa oo anay u raaci karin qof aanad ogayn.

Xaashida xidhiidhka degdeg ah, waxaad dugsiga siinaysaa:

- Telefon lambarkaaga
- Qof ku hadla Ingiriisi oo aad ku aamini karto carruurtaada. Kaasi wuxu noqon karaa xubin ka mid ah qoyska (oo aan ahayn ilma yar) ama saaxiib.
- Qofkaas telefon lambarkiisa
- Magaca iyo telefon lamabarka ilmahaaga dhakhtarkiisa
- Liistada waxyaabaha gaarka ah ee ilmahaagu u baahan yahay

Haddii ay magacyada iyo lambarada telefoonada ee xaashida ku yaal isbeddelaan, waa in aad u sheegtaa xoghayaha dugsiga magcayda iyo lambarada telefoonada ee cusub.

Haddii aad guurto, waa in aad dugsiga siisaa cinwaankaaga iyo lambarkaaga telefonka ee cusub.

2. Sideen u dalban karaa turjubaan?

Waxaad xaq u leedahay in aad kala xidhiidho dugsiga ilmahaaga tacliintiisa. Dugsiyadu waa in ay keenaan turjubaan ku hadla afkaaga ama ku turjumi kara.

Dugsigu waa **INAANU** weydiisan ilmahaaga inuu ku turjumo, ama aad adigu bixiso kharashka turjumaanka.

Dugsi kastaa wuxuu leeyahay hab u ku keeno turjubaanada. Mar-mar, macalimiinta ayaa dalbada turjubaanka. Marmar kalena, waa in aad xusuusiso dugsiga in aad u baahan tahay turjumaan. Eeg dabayaqaqada tuducdan maclumaadka habka dugsigu u dalbado turjumaanka ama weydii dugsiga in ay kuu macneeyaan.

Markaad la kulmayso ilmahaaga macalinkiisa ama shaqaalaha dugsiga waxaad codsan kartaa turjubaan. Waxaad codsan kartaa in waraaqaha laguu soo tarjumo ka hor intaan laguugu soo dirin guriga.

Fadlan ka eeg **Lifaaqayada 1 iyo 2** siyaabaha aad turjumaan ugala xidhiidhi karto dugsi.

Habka Dugsiga

3. Haddii uu ilmahaygu aad u buko oo aanu dugsi aadi karin?

Carruurta buktaa waxay xanuunka u gubinkaraan carruurta kale. Ha u soo dirin ilmahaaga dugsiga haddii:

Ilmuu leeyahay qandho



Ilmuu xalay matagay



Ilmuu aad u qufacayaa



Ilamha ay ka soo yaaceen finan iyo xabuub



Ilmuu leeyahay injir



Ilamha ay xanuunayso dhuuntu



Waxa jira marar kale oo aanay carruurtaadu aadi karin dugsiga. Kala hadal wakhtiyadaas dhakhtarkaaga ama macalinka dugsiga.

4. Haddii ilmuu aad u buko oo aanu aadi karin dugsi?

Waa muhiim inaad u sheegto dugsiga in ilmahaagu uu joogayo guriga sababta oo ah isaga oo aad u buka. Taasi waxay caawinaysaa nabadgalyada ilmahaaga. Macalinka ilmahaagu wuu ka werweri karaa ilmahaagu haddii aanu fasalka joogin oo aadan soo sheeginna inuu jirran yahay.



Habka Dugsiga

Wac xoghayaha dugsiga. U sheeg:

- Magaca ilmahaaga
- Macalinka ilmahaaga
- Goorta uu dugsiga ku soo noqonayo ilmahaagu

Ka eeg [**Lifaaga 4**](#) tusaalaha sida aad dugsiga u ogeysiin karta in aad haysato ilma buka oo aan dugsiga iman karin.

Waxa kale oo aad u qortaa macalinka waraaq sababta uu ilmahaagu u buko. Waraaqdaas waxa la yidhaa cudurdaar maqnaansho. Ilmahaaga ayaa u geyn kara macalinka marka uu dib ugu laabto dugsiga. Ka eeg [**Lifaaga 5**](#) waraaq tusaale ah oo aad istcimaali karto.

Carrurta jirran waa in ay dhamaystiraan shaqada guriga ee ka baaqatay.

5. Haddii ilmahaygu u baahan yahay inuu daawo ku qaato dugsiga?




Waa inaad u sheegto kalkaaliyaha dugsiga ama xoghayha dugsiga haddii ilmahaagu u baahan yahay inuu daawo ku qaato dugsiga. Ka eeg [**Lifaaga 6**](#) tusaale hadalka aad kala yeelan karto dugsiga ilmahaaga baahidiisa daawada.

Waxa kale oo aad u baahan tahay inaad tusto dugsiga xaashida dhakhtarka inuu ilmahaagu daawo ku qaadanayo dugsiga.

Xaashida dhakhtarka waa in ay ku yaalaan:

- Ilmahaaga magaciisa
- Magaca macalinka
- Magaca daawada
- Intay le'eg tahay daawada la siinaya ilmahaaga
- Goorta la siinayo daawada ilmahaaga



Dhakhtarka weydii inuu xaashi u qoro ilmahaaga. Weydii waxa ku qoran xaashida.

6. Haddii uu ilmahaygu ku jirrado dugsiga?

Dugsigu wuxu wici doonaa qofka ku qoran xaashida xidhiidhka xaalka degdega ah. Qofkaasi wuu ku soo wici karaa ama ilmuuhu qaadi karaa oo geyn karaa guriga. Waxa laga yaaba inaad u baahato in aad ilmahaaga gayso dhakhtarka.

Habka Dugsiga

7. Haddii ilmahaygu ka daaho dugsiga?

Daahida waxa la yidhaa "tardy." Qoyskaagu waa in ay aad isugu taxalujiyaa siday u hubin lahaayeen in ilmahaagu ku yimaad dugsiga wakhtigiisa. Tirada inta jeer ee ilmahaagu daaho waxa lagu qori doonaa xaashida warbixinta. Ilmahaagu wuu dhici karaa haddii ay badato daahidiisu sannadkii. Ilmahaagu waa inuu fasalkaas mar labaad qaato.

Waa inaad u sheegto dugsiga haddii ilmahaagu daahayo.
Wac xoghayaha dugsiga. U sheeg:

- Magaca ilmahaaga
- Magaca macalinka ilmahaaga
- Wakhtiga uu ilmahaagu imanayo dugsiga
- Sababta uu u daahay ilmahaagu




Ama, u qor xaashi dugsiga. Xaashidaasi waa in ay sheegto sababta uu u daahay ilmahaagu.

Ka eeg **Lifaaqayada 7 iyo 8** tusaale sida aad ugu sheegi karto in ilmahaagu daahayo.

8. Maxaan sameeyaa haddii ilmahaygu u baahdo inuu dugsiga hore uga baxo ballan dhakhtar awgeed?

Waa inaad u sheegto dugsiga in uu ilmahaagu leeyahay ballan dhakhtar oo uu hore u baxayo. Taas waxa la-yidhaa hore-u--bixid. Waad wici kartaa xoghayaha dugsiga ama u qor xaashi. Ka eeg **Lifaaqa 9** waraaq tusaale aad isticmaali karto si aad ugu sheegto dugsiga in ilmahaagu hore u baxayo ballan dhakhtar awgeed.

9. Ma aadi karaa ilmahayaga dugsigiisa?



Haa, waad aadi kartaa dugsiga ilmahaaga. Haddii aad tagto maalinta dugsiga, waxaad u baahan tahay waraaq lagu galo. Xafiiska tag oo waydiiso ruqsadda gelitaanka. U sheeg magaca ilmahaaga. U sheeg magaca macalinka.

Haddii aad rabto inaad la hadasho macalinka ilmahaaga oo aan kulan kuu ballansany, waa inaad qabsataa ballan maalin kale si aad ula kulanto.

Habka Dugsiga

10. Maxay yihiiin waraaqaha uu dugsigu ii soo diraa?

Dugsigu wuxu kuu soo diri karaa waraaqo muhiim ah. Waraaqahaasi waxay sheegi karaan

- Ilmahaaga shaqadiisa
- Ilmahaaga akhlaaqdiisa
- Dhacdooyinka dugsiga


Mar-mar waraaquhu waxay sheegi karaan dhibaatooyinka ilmahaaga dugsiga dhexdiisa. Ilmahaagu waxa laga yaabaa in aanu rabin in aad ogaato dhibaatooyinkiisa. Waa muhiim in **aanad** ilmahaaga odhan ii tarjum waraaqahaas. Marmar in aanu ilmahaagu fahmin macnaha waraaqaha ayaa laga yaabaa. Waxay kuu sheegi karaan waxaan sax ahayn.

Waxaad weydiin kartaa dugsiga in ay kuu tarjumaan waraaqahaas. Ama, waxaad codsan kartaa kulan. Xusuuso in aad codsato turjumaan haddii aanad si fiican ugu hadlin ama fahmin Ingiriisida.

Waa kuwan waraaqaha qaar ay kuu soo diraan macalimiintu:



Jadwal wuxu muujiyaa maalmaha sannad dugsiyeedka. Wuxu kuu sheegi karaa goorta aad aadi karto dugsi ee aad la kulmi karto macalinka. Wuxuu kuu sheegi karaa goorta aanu ilmahaagu aadayn dugsiga.



Wargeys wuxu sheega waxa ka dhaca dugsiga.



Tirakoob wuxu ku weydiin su'aalo la xidhiidha dugsiga.

Ogeysiis waa xaashi kuu sheegaysa dhacdo ka jirta dugsiga.



warqadda ogolaanshaha waa waraaq yar oo aad saxiixayso si aad ugu ogolaato in ilmahaagu sameeyo waxa dugsiga ka jira. Tusaale, haddii aad rabto in uu ilmahaagu raaco safar bixitaan ah dugsigu u baxayo, waa in aad saxiixdo waraaq. Ilmahaagu waraaqdaas ayuu dib ugu celinaya macalinkiisa.

Waraaqaha edbinta waxay sheegaan goorta uu ilmahaagu edeb-darro sameeyo. Macalimiintu waxay rabaan inaad ogaato marka uu ilmahaagu jabiyo qawaaniinta. Waxa laga yaabaa in aad saxiixdo waraaqda oo u dirto macalinka.

Habka Dugsiga

11. Maxay tahay xaashida warbixintu?

Xaashida warbixintu waa xaashi yar oo ka waramaysa ilmahaaga shaqadiisa dugsiga. Xaashiyaha warbixintu laba ama afar jeer sannad dugsiyeedka ayaa loo diraa waalidka.

Xaashida warbixintu waxa ku qoran fasal kasta oo ilmahaagu tago. Xaashida warbixintu waxa kale oo ay sheegtaa sida uu ilmahaagu ugu dhaqmo dugsiga.



Waa inaad saxiixdo xaashida warbixinta. Saxixa xashidu waxay dugsiga u muujinaysaa inaad aragtay xaashida warbixinta. U-dhiib xaashida ilmahaaga si uu dugsiga dig ugu celiyo.

Haddii aanad fahmin xaashida warbixinta, la hadal macalinka. Ha u dhiibin ilmahaaga si ay kuugu tarjumaan xaashida warbixinta.

Xaashiyada warbixintu waxay leedahay darajooyin. Darajooyinkaasi waxay kuu sheegayaan sida ilmahaagu ugu shaqeeyo dugsiga. Xaashiyaha warbixinnada qaar ayaa leh xuruuf. Xaashiyaha warbixinnada qaarna waxay leeyihii lambaro.

- Shaqada fiican, waxaad ku arki **A**. Waxed arki kartaa lambarada **91-100**. Macnaheedu waa ilmahaagu casharada wuu fahmaa.
- Shaqada fiicaan, waxaad ku arki **B** ama lambarada **81-90**. Macnaheedu waa ilmahaagu casharada wuu fahmaa laakiin xoogaa dhib ah ayuu qabaa.
- Shaqada dhexdhedaadka ah, waxaad ku arki **C** ama lambarada **71-80**. Macnaheedu waa ilmaahaagu wuxu u bahan yahay xoogaa gargaar ah.
- Shaqada aan fiicnayn, waxaad ku arki **D** ama lambarada **65-70**. Ilmahaagu wuxu u baahan yahay gargaar dheeraad ah.
- Haddii aad aragto **F** ama **lambaro ka yar 65**, ilmahaagu wuu dhacay fasalkaas. Macnaheedu waa ilmaahaagu wuxu u baahan yahay inuu imtixaanka mar kale qaato. Ilmahaagu wuxu u baahan yahay gargaar badan.

Mar-mar, waxaad arki xaraf wata calamad (+ or -). Waxay u ekaan kartaa sidan: **B+** ama **C-**. Calaamadda **+** macnaheedu waa ilmahaagu wuu ka fiican yahay darajada ku qoran laakiin uma fiican sida darajada sare. Tusaale: **B+** macnuhu waa ilmahaagu waa ka fiican yahay darajada **B**, mase u fiicna sida **A**.

Calaamadda **-** macnaheedu waa ilmahaaga shaqadiisu uma fiicna sida darajada ku qoran. **C-**, tusaale ahaan, waxay uga dhawdahay **D** ee uma dhawa **B**.

Haddii aad ku aragto **C** ama **D** (ama lambarada **65-80**) xaashida warbxinta, ilmahaagu wuxu u baahan yahay inuu u sii joogo dugsiga gargaar dheeraad ah ama macalin-khaas ah. Macalinka khaaska ahi waa qof ilmahaaga ka gargaara shaqadiisa dugsiga. Kala hadal macalinka sidii loo gargaari lahaa ilmahaaga.

Habka Dugsiga

Haddii aad ku aragto ilmahaaga xaashidiisa warbixinta **D** ama **F** (ama lambaro **ka yar 65**), codso inaad la kulanto macalinka. Adiga iyo macalinku waa inaad ka wada shaqaysaan sidii aad u caawin lahaydeen ilmahaaga. Ka eeg [Lifaaga 3](#) tusaale sida loo codsado kulanka macalinka ilmahaaga.

12. Sidee lagu kasbadaa darajooinka?

Macalimiintu waxay eegaan ilmahaaga shaqadiisa, shaqada-guriga iyo imtixaanada. Wuxuu kaa qaybaa inaad la kulanto macalinka. Shaqo fiican iyo dhaqan wacan macnaheedu waa darajo wanaagsan. Haddii aanad fahmin sida uu macalinku ku keenay darajada, la hadal macalinka.

13. Waa maxay warbixinta horumarku?

Mar-mar macalimiintu waxay ku siiyaan warka dhawrkii usbuuc ee kasta. Kaas waxa la yidhaa warbxinta horumarka. Waxay kuu sheegtaa sida uu ilmahaagu ugu shaqeyyo dugsiga. Haddii uu ilmahaagu warbixinta horumarka ku haysto **D** ama **F**, adiga iyo macalinku waxaad u baahantihiin inaad wada shaqaysaan sidii aad u gargaari lahaydeen ilmahaaga.

14. Miyaa la iga rabaa inaan lacag baxsho dugsiga?



Waxa laga yaabaa inaad bixiso ujro yar, ama lacag yar waxyaabo uu isticmaalo ilmahaagu.

Tusaale, waxaad bixin kartaa **ujro buug**. Taasi waa qaddar yar oo aad u bixinayso si uu ilmahaagu u isticmaalo buugaagta dugsiga. Haddii aanad haysan lacag, codso in lagaa dhaafio. Dhaafitaanku waa lacag yar baad bixinaysaa ama lacag la'aan weeye. Waa inaad u sheegto macalinka sababta aad u rabto ujrada yar. Fadlan ka eeg Lifaaga 10 siyaabaha loo codsado dhaafitaanka.

Ilmahaagu wuxu u baahan yahay inuu ilaaliyo buugaagta. Buugaagta qaar ayaa u baahan in loo celiyo macalinka. Haddii uu ilmuhi jarjaro buugaagtaas, waxay noqonaysaa inaad bixiso lacag.



Carruurtu waxay ciyaraan ciyaro ama ku bartaan muusiq dugsiga ka bacdi. Kuwaasi waxay joogaan lacag oo lagu magacaabi karo **ujrada waxqabadka** gaarka ah. Haddii uu ilmahaagu ciyaro ciyaar, ujradu waxay daboolaysaa dharka, kabaha iyo gaadiidka. Haddii uu ilmahaagu rabo inuu ciyaro qalab, ujradu waxay daboolaysaa kirada qalabka iyo casharada.

Habka Dugsiga

Haddii aad rabto in ilmahaagu ka qayb-qaato ciyaaraha iyo waxqabadyada kale laakiin aanad lacag ku filan haysan, waxaad kala hadli kartaa ujrada ilmahaaga macalinkiisa. Wuxuu heli kartaa in lagaa dhaafo ama laga dhimo ujrada..

Waxa kale oo aad bixin kartaa ujro haddii ilmahaagu tago **safar dugsiyeed**. Haddana, waad ka codsan kartaa macalinka dhaafitaan ama ujro yar.

Ka eeg halka ugu danbaysa tuducdan nidaamka dugsiga sida loo codsado dhaafitaanka ujrada. [**Lifaaga 10**](#) waxa ku yaal tusaalooyin sida loogala xidhiidho dugsiga codisga dhaafitaanka.



Haddii ilmahaagu u bahan yahay inuu ka iibsado dugsiga **qado**, waa inuu lacag haystaa. Kala hadal shaqaalahaa arrintaada ama dugsiga haddii aanad lacag haysan. Wuxu ilmahaagu heli karaa qado lacag la'aan ah.



Tuducdan halkeeda danbe waxa ku yaal macluumaadka nidaamka dugsiga sida loo codsado qado bilaash ah. [**Lifaaga 10**](#) waxa ku yaal tusaale sida loo warsado dugsiga dalabka barnaamijka qadada bilaashka ah.

15. Yaan la hadli karaa haddii aan su'aalo qabo?

Weydii ilmahaaga macalinkiisa ama xoghayaha dugsiga su'aalaha. Xusuuso inaad codsato turjumaan haddii aanad aqoon Ingiriisida. Xaq baad u leedahay markaad la hadlayso dugsiga ama macalimiinta.

V. Ka-qayb-qaadashada Waalidka



Ameerika waalidka iyo macalimiintu waxay ka wada shaqeeyaan siday uga dhigi lahaayeen carruurta arday fiican. Macalimiintu waxay kaa filayaan inaad ka-qbaby-qaadato ilmahaaga tacliintiisa. Macnuhu waa inaad la kulantaa macalimiinta, kala hadashaa ilmahaaga dugsiga oo ku taageertaa casharadiisa.

Maclimiintu waxay rabaan in ay kula kulmaan. Waxay rabaan inaad soo booqato dugsiga. Waxay rabaan in ay maqlaan waxaad leedahay.

Waa kuwan siyaabahaad ku caawin karto ilmahu siduu u noqon karo arday fiican

- Deji rajayn (filasho)
- Tag hanuuninta dugsiga
- Tag shirarka waalid-macalinka
- Qor ilmahaaga waxqabadyada dugsiga ka bacdi
- Tag xafladaha dugsiga
- Ilamahaaga kula shaqee guriga dhexdiisa

1. Sideen u dhigaa rajayn shaqada dugsiga ee ilmahayga?

Rajadu waa waxa aad rabto inuu ilmahaagu qabto. Carruurtu waa in ay ogaadaan in dugsigu yahay muhiim. Wuxaa dugsiga u sheegi kartaa in ardayga fiicanii adigana kugu yahay muhiim.

Marka ugu horreysa u sheeg ilmahaaga waxaad rajaynayso inuu ka qabto dugsiga. Waa kuwan tusaalooyin rajada aad ka fililankarto ilmahaaga:

Waalid ahaan, waxaan rajeynayaa in ilmahaygu uu:

- Dhagaysto dhammaan casaharada dugsiga
- Dhammeeyo dhammaan shaqada guriga
- Wax u akhriyo imtixaanada
- Weydiyo macalinka waxa uu ka fahmi waayo casharka
- Hoggaansamo qawaaniinta macalinka
- Ixtiraam kula dhaqmo macalinka
- Ixtiraam kukla dhaqmo carruurta kale
- Ii sheego ama macalinka marka uu dhib ku qabo casharka
- Ii sheego ama maclalinka marka uu dhib ka qabo carruurta kale

Ka-qayb-qaadashada Waalidka

Ilmahaaga u sheeg wuxu filanaayo. Ilmahaaga xasuusi markuu hilmaamo. Tag dugsiga oo la kulan ilmahaaga macalimiintiisa. Taasi waxay u muujinaysaa ilmahaaga sida uu dugsigu muhim u yahay.

2. Maxay tahay hanuunin?



Hanuunin waa marka lagugu marti-qaado inaad tagto bilawga sannadka dugsiga ilmahaaga. Wuxaan la kulmi macalimiinta ilmahaaga. Marmar waxa lagu sheegaa ‘guri-furan.’

Waxaad arki kartaa ilmahaaga fasalkiisa. Waxaad arki kartaa meesha uu ilmahaagu fadhiisto.



Waxaad la kulmi kartaa xoghayha dugsiga. (Kaasi waa qofka aad u wacdo marka uu ilmahaagu buko ama dugsiga ka daaho.)

Hanuuninta waxaad la hadli kartaa macalimiinta. Waa kuwan su'aalaha aad hanuuninta ku weydiin kartaa macalimiinta:

- Halkuu fadhiistaa ilmahaygu?
- Muxuu bartaa ilmahaygu?
- Maxaa dhacaa maalintii dugsiga?
- Ma arki karaa shaqada ilmahayga ee dugsiga?
- Sidee ilmahaygu u heli karaa gargaar?
- Immisa arday oo kale ayaa ku jira fasalkan?
- Immisa arday oo kale ayaa baranaya Ingiriisida?
- Sidee ilmahaygu u dhaqamaa fasalka? Ama, muxuu yahay qaunuunka fasalku?
- Sidee ilmahayga u bartaan anshaxa?
- Sidee u caawin karaa ilmahayga guriga markuu joogo?

Haddii aad gargaar uga baahato la hadlka macalinka, dugsiga weydiiso turjumaan maalmo ka hor hanuuninta. Ka eeg **Lifaaqyada 1 iyo 2** tusaale sida loo codsado turjumaan.

3. Waa maxay shirarka maclin-waalid?



Shirarka Waalid-macalin waa marka ay waalidka iyo macalimiintu kulmaan ee ka wada hadlaan waxyabaha ay carruurtu ku bartaan dugsiga. Waxay ka hadlaan shaqada dugsiga ee ilmaha iyo haddii uu yahay arday fiican. Wuxa kale oo ay ka hadlaan edeba ilmaha.

Waa kuwan su'aalahaaad weydiin karto macalinka:

- Muxuu ilmahaygu ku bartaa dugsiga?
- Ma arki karaa ilmahayga shaqadiisa?
- Ma yahay ilmahaygu arday fiican?
- Casharradee jecel yahay ilmahaygu?
- Casharradee ku adag?
- Sidee ayey macalimiintu uga dhigi karaan ilmahayga arday fiican?
- Sidee uga dhigi karaa ilmahayga arday fiican?
- Maxaan ku gargaari karaa ilmahayga haddii aan aniguba baranayo Ingiriisida?
- Sidee uga dhaqmaa dugsiga ilmahaygu?
- Waa kuwee ilmahayaga saaxiibadiis?
- Maxaan guriga ku sameeyaa si ilmahaygu ugu edeb wacnaado



Haddii aanad ku hadal ama si fiican u fahmin Ingiriisida, waxaad u baahan tahay turjumaan kuu raaca shirka. Marka macalinku kuu ballamiyo kulanka, weydiiso macalinka turjumaan. Xaq baad u leedahay turjumaan.



Fadlan ka eeg **Lifaaqyada 1 iyo 2** siyaabaha aad u codsan karto turjumaan.

Waxa kale oo aad kala hadli kartaa macalimiinta ahmiyadaada waalid ahaan. Ahmiyaddu waa waxyabba ku werwer geliya.

Waa kuwan su'aalahaaad weydiin karto macalimiinta:

- Ilmahaygu wuxu u maleeyaa inuu wuxu doono oodhan karo waayo waa "xor" Ameerika gudaheeda. Guriga waxyaabo xun ayuu ku hadlaa. Muxuu ilmahaygu ku bartaa dugsiga? Ka warran haddii aan diidanahay casharradaas?

Ka-qayb-qaadashada Waalidka

- Ilmahaygu waxay tidhi waxaan doono waan samayn karaa. Haddii aan isku dayo inaan ka joojiyo, waxay tidhi waxaan u wici 911. Sidaasi ma sax baa?
- Ilmahaygu waxay tidhi ma lihi shaqo-guri, laakiin waxaan u malayn in ay leedahay. Sidee iigu sheegi kartaa markay leedahay shaqo-guri?
- Ilmahaygu si fiican uma seexato habeenkii oo waxay u dhaqantaa si waalan. Muxuu dugsigu ku caawin karaa?
- Ma fahmo ilmahayga shaqadiisa guriga. Waxan bartaa Ingiriisida.

Waxaad kala hadli kartaa macalinka waxyabaha fiican ee ilmahaagu barto. Waa kuwan waxyabaha aad weydiin karto macalimiinta:

- Ilmahaygu waxay tidhaa waa jilicsan yahay shaqada gurigu. Waxa kale oo ay tidhaa waan jecellehay dugsiga. Sidee ugu gargaari karaa waxbarashadeeda?
- Ilmahaygu wuxu jecel yahay inuu ka caawiya shaqada guriga walaaladiis. Muxuu ka samayn karaa dugsiga si uu u dhiiri-gelio kuwa kale?
- Maxaad u malaynaysaa in ay yihiin Barnaamijyada iyo falalka uu jeclaysan karo ilmahaygu. Sideen u gelin karaa ilmahayga barnaamijyadaas?
- Ilmahaygu wuxu rabaa inuu dhakhtar noqdo. Muxuu dugsigu barnaamijyo u hayaa si uu ugu diyaar-garoobo?
- Ilmahaygu wuxu rabaa inuu tago kulliyadda dadweynaha. Muxuu dugsigu ku caawin karaa? Maxaan samayn karaa?

Waa muhiim inaad weydiiso dugsigu wuxuu u qaban karo ilmahaaga si uu u dhiirigeliyo. Waxa kale oo muhiim ah in aad barato wax aad samayn karto.

Shirarka Waalid-macalinka waxa la qabtaa hal mar gu'gii iyo hal mar jiilaalkii. Macalimiinta ayaa ku soo wici doona ama kuu soo diri waraaq si ay kuugu qabtaan ballan. Waalidku waxay codsan karaan kulan macalinka ah markay doonaan sannadkii. Xusuuso inaad warsato dugsiga turjumaan kaa caawiya la-hadalka macalinka.

Waxaad kala hadli kartaa macalinka:

- Shaqada ilmahaaga iyo xaashida warbixinta
- Ilmahaaga edebtiisa
- Casharada uu ilmahaagu ku barto dugsiga
- Wax ilmahaaga dugsiga kaga dhacay

Lifaaga 3 wuxu leeyahay tusaale sidaad u codsan karto inaad la kulanto macalinka.

4. maxay yihiiin waxqabadyadu dugsiga kadib?

Marka ay maalintu dhammaato, waxa jira waxyaabo badan oo uu ilmahaagu samayn karo. Waxyaabahaas waxa la yidhaahda waxqabadyada dugsiga kadib. Qof wayn waa inuu maamulaa waxqabadkaas. Qofkaasi ma noqon karo ilmahaaga macalinkiisa. Tababare waa qof weyn oo ardayda bara ciyaaraha.

Waa kuwan qaar ka mid ah waxqabadyada uu ilmahaaga dugsigiisu yeelan karo:

Cayaarta – sida
kubadda cagta



Macalin-khaas
ah oo ilmahaaga
ka gargaara
shaqada
dugsiga



Ururo, oo ah
ururo ilmaha jecel
wax isku mid ah



Qoob-ka ciyaar
ama masrax



Muusiq




Ka-qayb-qaadashada Waalidka

Dugsiga kadib falalka u fiican carruurta iyo waalidka. Dugsiga kadib carruurta falalkooda:



La kulmaan
asxaab cusub



Bartaan
waxyaabo cusub



Isku diyaariyaan
kulliyadda

Waalidka qaar ayaa jecel waxqabadyada dugsiga kadib waayo waxay siiyaan ilmaha meel nabdoon oo lagaga warhayo.

Waalidku waa inuu weydiyo su'aalo la xidhiidha waxqabadyada dugisiga kadib:

- Immisa lacag ah ayuu qiimaheedu yahay?
- Sidee ayuu ilmahagu gurigu ku imaanayaa waxqabadka dugsiga kadib?
- Sidee ayey waalidku ku qori karaan ilmaha waxqabadka dugsiga kadib?



Qiimaha

Waxqabadyada dugsiga kadib qaarkood ayaa lacag jooga.

Taas waxa la yidhaa ujro. Tusaale, waxaad bixin kartaa lacagta dharka ama kabo cusub. Ama waxaad bixin kartaa casharada muusiga.

Warso dugsiga qiimaha waxqabadka. Wixa kale oo aad warsataa inaad ilmahaaga ka bixin karto ujro yar. Ka eeg **Lifaaga 10** sida loo codsado dhaafitaan ujro.



Gaadiidka

Waxqabadyo badan ayaa loo qorsheeyaa dugsiga kadib.

Waalidku waa inay warsadaan sida uu ilmahooodu ku soo hoyanayo. Dugsigu bas ayuu yeelan karaa. Dugsigu wuxuu

Ka-qayb-qaadashada Waalidka

siin karaa ilmahaaga wax uu baska magaalada ku raaco. Ama, qof ayaa soo qaadi kara ilmahaaga.

Haddii uu ilmahaagu u baahan yahay in la soo qaado, warso goorta uu waxqabadku dhammaanayo iyo meesha uu joogayo ilmahaagu.

Qoritaan

Waa inaad qorto ilmahaaga waxqabadka dugsiga kadib. Taas macanaheedu waa inaad saxeexdo waraaqo u fasaxaya inuu ilmahaagu ka-qayb-qaato. Hubi inaad fahamto intaanad saxeexin.



Haddii aad dhib ku qabto akhriska waraaqaha, macalinka ama tababaraha u dhiib, ha kuu sharxaane. Warso in laguu tarjumo.

U-sheeg dugsiga qofka la wacayo xaaladda degdega ah. Sii magaca iyo lambarka telefonka qofaad aaminsantahay. Qofkaas oo qudha ayaa qaadi kara ilmahaaga.

5. Maxay yihiiin xafladaha dugsigu?

Dugsiyadu waxay yeelan karaan ciyaaro kubadda cagta ah ama riwaayado. Kuwaas waxa la yidhaa xaflado. Xafladaha badidoodu waa lacag la'aan ama waxay joogaan lacag yar.

Haddii uu ilmahaagu ciyaaro kubadda cagta oo ciyaari jirto, waa muhiim inaad tagto.



Tus ilmahaaga inaad taageerayso oo uu si fiican u qaban karo waxyaabo cusub.



Ilmahaagu wuxu baran kalsoonida iyo ixtiraamka. Kalsoonidu waa marka uu ilmuuhu u arko inuu wax qaban karo. Ixtiraamku waa marka uu ilmuuhu qofka kale iska horreysiyo.

Waxa kale oo aad la kulmi doontaa waalid kale iyo ilamhaaga saaxiibadiis.

6. Sideen ugu caawin karaa ilmahayga guriga?



Carruurtu waa jecel yihiiin marka wax laga weydiyo dugsiga. Su'aalahaagu waxay muujinayaan in ay muhiim tahay inuu ilmahaagu noqdo arady fiican.

Jarrib inaad weydiiso su'aalo fura inaad la hadasho

Ka-qayb-qaadashada Waalidka

ilmahaaga. Ka fogow su'aalaha uu ilmahaagu kaga baxayo "haa" ama "maya".

Waa kuwan su'aalaha qaar aad weydiin karto ilmahaaga:

- Maxaad ku soo baratay dugsiga maanta?
- Maxay tahay qaybta ugu wanaagsan maalintada?
- Maxaa ugu adkaa?
- Maxaad haysata shaqo-guri?
- Sideen kaaga caawin karaa casharkaaga?

Haddaad garan weydo waxa uu ilmahaagu ku barto dugsiga, macalinka warso inuu kuu sharxo casharka.

Ilmahaaga ha kuu sheego shaqadiisa guriga. Ilamhaaga shaqadiisa gurigu waxay noqon kartaa:

- Shaqo ay ku bilaabeen dugsiga. Ilmuu waa inuu guriga ku dhammaystiro.
- Tababar guriga ah oo ah wax ay ku soo barteen dugsiga.
- Warbixin ama mashruuc. Warbixin waa markuu ilmahaagu qorayo wax uu soo bartay. Mashruuc waa markuu ilmuu fasalka u sheegayo wax ay barteen.
- Isku-diyaarin imtixaan.

Ilmahaaga xasuusi inuu faaruqiyo shandadiisa. Mar-mar carruurtu waxay ku lumiyaan shaqadooda shanddada haddii ay ka buuxaan waraaqo duug ahi.

7. Sideen ilmahayga uga caawin karaa shaqadiisa guriga haddii aanan ku hadlin Ingiriisida?



Wakhti sii shaqada guriga. Wakhtigaasi wuxu noqon karaa dugsiga kadib ama cashada kahor. Waa inuu noqdo isla wakhti qudha maalin kasta. Carruurtu waxay sameeyaan shaqo-guri maalin kasta.

U-sheeg ilmahaaga inuu wakhtigaasi yahay shaqo-guri oo keli ah. Bakhtii TV-ga iyo raadiyaha. Ilmuu wuxu u baahan yahay meel deggan sii uu u shaqeeyo.

Maya



Hubi inuu

Maya



ilmahaagu si fiican u seexdo habeenkii. Taas

Ka-qayb-qaadashada Waalidka

macnaheedu waa TV, muusiq iyo wax ciyaar ah wakhti danbe habeenkii majirto.

Fiiri ilmahaaga shaqadiisa guriga. Weydii inuu wax kaaga sheego shaqada guriga. Mar-mar waxay carruurtu arkaan wax ay khaldeen markay ka hadlaan shaqadooda guriga.

~~Kat~~ Cat

Dhugo haddii ilmahaaga dhibi ka hayasato shaqada guriga. Ilmahaagu waa niyad-jabi karaa. Kala hadal dhibta uu ku qabo shaqada guriga. Haddii aanad gargaari karin la hadal macalinka. Markuu macalinku ogaado inuu ilmahaagu u baahan yahay kaalmo, macalinku wuxuu u heli doonaa wakhti uu ku caawiyo.



Ka eeg **Lifaaga 3** siyaabaha aad u codsan karto kulanka macalinka si aad ugala hadasho dhibta ka haysata ilmahaaga casharada.

Mar-mar, carruurtu ma rabaan inay qabtaan shaqada guriga. Waxay rabaan inay ciyaaraan ama daawadaan TV. Waxay kuu sheegi karaan in aanay lahayn shaqo-guri. Haddii ilmahaagu qaban waayo shaqadiisa guriga, dhib ayuu kala kulmi doonaa dugsiga.

Warso macalinka inuu waraaq ka soo qoro shaqada-guriga ilmahaaga maalin kasta. Haddii aanu ilmahaagu lahayn shaqo-guri, macalinka ayaa kuugu sheegi waraaq. Haddii aanad akhriyi karin Ingiriisi, warso macalinka inuu kuu soo sawiro oo ku soo saxeexo magaciisa.

Tusaale, waraaqda macalinku sidan ayey u ekaan haddii aan shaqo-guri jirin:

(Ingiriis)

Dec. 13, 2006

Dear Parent,

Your child does not have homework today.

Thank you,

A handwritten signature in black ink, appearing to read "International Rescue Committee".



Ka-qayb-qaadashada Waalidka

(Tarjumad)

Dec. 13, 2006

Gacliye Waalid,

I lamahaagu manta ma laha shaqo-guri.



mahadsanid,

Ilmahaaga la baro Ingiriisida. Caruurta guriga wax ku akhridaa hore ayey u bartaan Ingiriisida. Waalidka yaqaan Ingiriisidu ilmihiisa wuu ka caawin karaa shaqada guriga. (Barashada Ingiriisidu waxa kale oo ay kaa caawin kartaa sidaad ku heli kari lahayd shaqo lacag wacan bixisa.)



Wakhti samayso aad guriga wax ku akhrido. Waad u akhriyi kartaa ilmahaaga, ama ilmahaaga ayaa kuu akhriyi kara.

8. Maxaa kale ee aan samayn karaa si uu ilmahaygu u no qodo arday fiican?

Macalinka ama xoghayaha dugsiga warso haddii ay joogaan shaqaale dibedda-gaadha. Shaqaalaha dibeeda-gaadhaa waa qof la shaqeeya qoysaska iyo ardayda. Waxay kuu ballamin karaan turjumaan. Waxay kaa caawin karaan barashada dugsiga iyo fasalada. Waxay ka jawaabi karaan su'aalahaaga.



Warso haddii dugsigu leeyahay La-taliye Haga. La-taliye hagaa waa qof ka caawin kara ilmahaaga qorashaha kulliyadda ama shaqada. Wuu ka jawaabi karaa su'aalahaaga. Haddii ilmahaaga dhibi ka haysato dugsiga ama edeb-darrada, la-taliyaha ayaa caawin kara.

Isticmaal tusaalaha Lifaaga si aad u codsato kulanka la-taliyaha haga.

Ka-qayb-qaadashada Waalidka

Waa kuwan su'aalaha qaar aad weydiin karto la-taliyaha haga::

- I Imahayga dhib ayaa ka hayasata dugsiga? Maxaan fali karnaa?
- I Imahayga dhib ayaa ku haysata guriga? Wuxu u dhaqmaa sida _____ . Maxaan samayn karnaa?
- I Imahaygu wuxuu rabaa inuu ka helo shaqo_____. Muxuu samyan karaa?
- I Imahaygu wuxuu rabaa inuu tago kulliyad. Muxuu samyn karaa? Immisa ayey ku kacaysaa? Sideen u bixin karnaa dugsiga?

Warso haddii uu dugsigu leeyahay barnaamij qoysaska lagu baro

Ingiriisida. Dugsigu wuxu u samyn karaa fadhi waalidka carruurta baranaysa Ingiriisida. Waxa joogi kara turjumaano ama shaqaalaha-dibedda oo ka jawaabi kara su'aalahaaga.

Faham waraaqaha dugsigu kuu soo diro. Waraaquhu waxay kuu sheegi karaan ilmahaaga shaqadiisa iyo edebtiisa. Waxay sheegi karaan haddii ilmahaaga dhibi ka haysato casharada, edeb-darro ama uu la diriro carruurta kale.

Waraaquhu waxa kale oo ay ilmahaaga ka sheegi karaan wax wanaagsan. Waxay kuu sheegi karaan inuu si fiican uga shaqeeeyey imtixaan, ama fasalka gargaaro ama uu ka shaqaynayo mashruuc gaar ah.

Waa muhiim inaad ogaato waxa uu ilmahaagu ka sameeyo dugsiga. Haddii aanad fahmin waraaqaha, codso kulan macalin. **HA** warsan ilmahaaga inuu kuu tarjumo waraaqaha.

Waad weydiin kartaa macalinka inuu kuu macneeyo waraaqaha markaad codsato kulanka. Ka eeg [Lifaaga 3](#) tusaale sida loo codsado kulanka macalinka si aad uga la hadasho waraaqaha guriga laguugu soo diray.

VI. Qawaaniinta Dugsiga iyo Anshaxa



Dugsi iyo fasal kastaaba wuxuu leeyahay qawaaniin loo baahan yahay inuu raaco. Qawaaniintu waxay ilmaha fartaa sida uu uga dhaqmayo dugsiga. Qawaaniintu waxay ilmaha u sheegtaa waxa ka mamnuuca ah inuu keeno dugsiga.


1. Muxuu ilmahaygu ugu hogansamayaa qawaaniinta?

Waa muhiim in ilmahaagu raaco qawaaniinta. Qawaaniintu waxay ilmaha ku dhawrtaa nabadjelyo. Qawaaniintu waxa kale oo ay ilmaha ka gargaartaa barashada casharadooda.

Macalimiintu waxay qawaaniinta u sheegaan carruurta sannadka bilowgiisa. Waalidku waxay ka bartaan qawaaniinta waraaqaha dugsigu guriga ugu soo diro. Waalidku waxay ka bartaan qawaaniinta goorta shirarka waalid-macalinka ama maalinta qalka-furan ee dugsiga.

2. Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu raaci waayo qawaaniinta?

Cawaaqib ayaa jira haddii ay carruurtu jabiyaan qawaaniinta. Ilmuu waxay bartaan cawaaqibkaas isla marka ay baranayaan qawaaniinta. Mar-mar cawaaqibku waxay yihii talaabo edbin ah. **Su'aasha #7** ee tuducdan ayaad ka heli maclumaaad dheeraad ee ah talaabooyinka edbinta.



3. Maxa ka mid ah qawaaniinta dugsiga?

Qawaaniinta dugsiyada qaar waxay ku qoran yihii **bogga 3** ee bilowga gacan-qabsigan. Waxa kale oo aad ka heli kartaa qawaaniinta ilmahaaga dugsigiisa dabayaqaqada tuducdan.

Haddii aad fahmi weydo qawaaniinta, la hadal macalinka.

4. Maxay yihiin waxyaabaha aan la ogolayn?

Waxyaabaha aan la ogolayn waa waxyaabaha aanu ilmahaagu u soo qaadan **KARIN** dugsiga. Waa kuwan liistada waxyaabhaas qaarkood.



MAYA Wax ciya
ama dhawaaqa
“ beepers or
pagers ”



MAYA
Qaraaxad



MAYA Telefonka
gacanta



MAYA Qoriga
rashka



MAYA Qallinka
laysarka



MAYA silsiladda
dharka ku taal



MAYA
Maandooriye
(daroogo) iyo
khamri



MAYA Mindiyo



Maya qori (xabbad)



MAYA Sigaar

Qawaaniinta Dugsiga iyo Anshaxa

Waxyaabaha la diiddan yahay qaar badan ayaa halis ah. Haddii uu ilmahaagu la yimaad waxyaabaha aan la ogolayn dugsiga, dugsigu wuu ka qaadi doonaa. Ilmahaagu wuxuu tagi doonaa xafiiska maamulaha. Midda kale, waa la eryi karaa. Taas macnaheedu ilmahaaga waa laga joojin karaa dugsigaas. Waa arrin aad u adag.

Dugsiga ilmahaagu wuxu mamnuuci karaa waxyaabo kale. Dabayaaqada tuducdan waxaad ka heli kartaa macluumaaad dheeraad ee waxyaabaha mamnuuca ka ah ilmahaaga dugsigiisa. Waa kale oo aad la hadli kartaa ilmahaaga macalinkiisa haddii aad qabto su'aalo.

5. Waa maxay waxyaabaha kale ee aan la ogolayn?

Madax saarka sida masarka ama koofiyadda lama ogola haddii aanu ilmahaagu u xidhnayn sababo diimeed awgeed. Dugsiyada qaar, taas macnaheedu waa inuu ilmuuhu iska qaado koofiyadda.

MAYA




MALAHAA



Lahadal ilmahaaga macalinkiisa haddii aad su'aal ka qabto madax saarka.

Wixii tilmaamaya ama taageeraya qawlaysato lama ogola. Magaalooinka qaar ayaa leh kooxo ciyaal ama dadweyn ah oo rabshado sameeya. Kooxahaas waxa la yidhaa qawlaysato. Dugsiyadu ma ogola in ilmuuhu dugsiga ku taageeraan qawlaysatada. Taas macnaheedu waa dharka qaarkood lama ogola dugsiga dhexdiisa.

Waa kuwan tusaalooyin dharka qawlaysatada aan laga ogolaan karin ilmahaaga dugsigiisa.



Masarada midabka
leh qaarkood



Calaamadaha
Qawlaysatada

Qawaaniinta Dugsiga iyo Anshaxa

Lama ogola calaamadaha ka xanaajinaya ardayda kale. Calaamaduhu waa sawiro ama calaamado u taagan wax. Waxay ku gefi karaan ardayda kale ama macalinka. Macalinka warso calaamadaha aan dugsiga laga ogolayn.

6. Sideen kuogaanayaa haddii ilmahaaygu jabiyo qawaaniinta?

Dugsiga ayaa ku soo wici ama waraaq kuu soo qori haddii ilmahaagu jabiyaan qawaaniinta. Dugsigu wuxuu ku weydiin karaa in ay kula kulmaan.

Marar badan carruurtu ma rabaan in waalidkoodu ogaadaan haddii ay jabiyaan qawaaniinta. Waa muhiim in **AANAD** weydiisan ilmahaaga inuu kuu tarjumo waraaqaha dugsigu kuu soo diro. Waxa kale oo muhiim in **AADAN** weydiisan ilmahaaga inuu kuu turjumo markaad la hadlayso macalinka.

Weydiiso macalinka turjumaan. Waxa kale oo aad kaxaysan kartaa saaxiib marka aad la kulmayso macalinka.

7. Maxay tahay tallaabada edbintu?

Tallaabada edbintu waa ciqaabta edeb-darrada. Waa waxa uu dugsigu sameeyo marka uu ilmuhi jabiyo qawaaniinta.

Waa kuwan waxyaalaha uu samayn karo dugsigu marka uu ilmuhi jabiyo qawaaniinta. Dugsigu wuxu:

- Siin karaa wakhti bixid ah
- Ka qaadi karaa mudhaanta
- U-dirri karaa xafiiska maamulaha
- Weydiisan karaa inay la hadlaan waalidka
- Siin karaan xayiraad ama hayn
- Ka joojin karaan ama eryi karaan ilmahaaga

Ilmahaaga dugsigiisu wuxu qaadan karaa tallaabooyin kale oo edbin ah. Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan tallaabooyinka edbinta ee dugsigu isticmaali karo waxay ku qoran yihiin dabayaaqada tuducdan.

8. Waa maxay wakhtiga bixidu?

Wakhti bixidu waa marka ilmaha uu si deggan u fadhiisto ee ka fekiro wixii qalad ah sameeyyeen. Ilmaha yaryar ayey ku shaqaysaa ciqaabtani.




Qawaaniinta Dugsiga iyo Anshaxa

9. Maxaa dhaca marka ay macalimiintu ka-qaaddo mudnaanta?

Macalimiintu waxay ka qaadaan mudnaanta. Taas macnaheedu waa ilmaha looma ogolaanayo wuxu jecel yahay inuu qabto. Tusaale, macalinku uma ogolaanayo ilmaha inuu ciyaaro wakhtiga biririfta asaga ama ayada edeb-darroodo awgeed.

10. Maxaa dhaca marka loo diro ilmaha xafiiska maamulaha?



Mar-mar ilmaha waxa loo dira xafiiska maamulaha markay sameeyaan wax xun. Maamuluhu wuxu ku leeyahay dugsiga awood badan. Maamuluhu wuxu la hadli ilmaha oo go'aamin ciqaabta. Mar-mar, waalidka ayaa kala kulma maamulaha anshaxa ilmahooda.

11. Waa maxay xayiraadu?

Xayiraadu waa marka ilmaha lagu hayo dugsiga kadib. Wuxu fadhiyaa fasal illaa macalinku yidhaa bax. Ilmuu waxay ka shaqeeyaan intay xayiran yihiin shaqada guriga. Ma hadli karaan mana cayaari karaan.



Haddii ilmahaaga la xayiro, waa muhiim inaad kala hadasho wuxuu ku gafay. Taasi waa goor habboon in la xusuusiyoo ilamaha wuxuu filan karo markuu gafo.

12. Maxay tahay joojintu?

Joojintu waa marka aanu ilmahaagu tegi karin dugsiga dhawr maalmood. Ilmuu waa inuu guriga joogo oo aanu ciyaarin.

Dugsigu wuu u digi karaa waalidka intaanu ilmaha ka joojin. Ilmaha waa la joojin karaa digniin la'aan marka ay halis yihiin. Tusaale, ilmaha waa la joojin karaa haddii ay dugsiga keenaan waxyaabo mamnuuc ah.

Joojintu waa arrin culus. Ilmaha casharro ayaa dhaafa marka la joojiyo. Waa inay iskood u bartaan casharka. Waa inay qabtaan shaqadooda iyagoon gargaar ka

Qawaaniinta Dugsiga iyo Anshaxa

helin macalinka. Joojitaanku wuxuu dhib ka dhigaa siday ilmuuhu ku noqon lahaayeen arday fiican.

13. Waa maxay cayrintu?

Cayrintu waa marka dugsigu go'aansado inuu ilmahaagu yahay halis oo aanu ku soo noqon karin dugsiga. Ilmaha waa la cayriyey.

Mar-mar waalidka ayaa la siiyaa digniin haddii ilmaha la cayrinayo. Taas macnaheedu waa in ilmuuhu beddelo dhaqankiisa haddii kale ciqaabtu waa cayrin. Waa muhiim inaad la hadasho dugsiga haddii ilmahaagu helo digniin.

Waxa kale oo ilmaha lagu cayrin karaa digniin la'aan haddii uu sameeyo wax xun. Ilmaha waa la eryi karaa haddii uu hub la yimaaddo dugsiga.

Cayrintu waa arrin culus. Carrurta la eryaa dhib badan ayaa kala kulanta siday ku heli lahaayeen dugsi kale, una dhammaysan lahaayeen dugsiga sare ee u geli lahaayeen kulliyad. Carrurta la cayriyaa waxa kale oo ay haysaan karaa dhib xagga booliska ah.

Haddii uu ilmuuhu jabiyo qawaaniinta in badan, macalinku wuxu codsan karaa inuu la kulmo waalidkiisa. Waalidku waa inay la shaqeeyaan macalinka si loo hubiyo inuu ilmuuhu fahmo sida loo dhaqmo.

Sida badan macalinku wuxu u diraa waalidka waraaq uu ku codsanayo kulan. **HA** warsan ilmahaaga inuu kuu tarjumo waraaqada.

Haddii uu macalinku kaa codsado kulan, xasuusi macalinka in aad u baahan tahay turjumaan.

VII. Isku-diyaarinta Kulliyadda

1. Waa maxay kulliyad?

Kulliyad waa dugsi, ka danbeeya dugsiga sare oo u diyaariya ardayda mihnadooda. (Mihnad waa shaqada uu ilmahaagu rabo inuu qabto markuu weynado.)




Kulliyaduhu waxay noqon karaan laba ama afar sanno. Kulliyadda labada sanno ah waxa la yidhaa kulliyadda bulshada. Kulliyadda afarta sanno ah waxa la yidhaa kulliyad ama jaamicad. Kulliyadaha xirfadda ama farsamada waa laba sanno oo laga barto xirfadda gaarka ah ee shaqaaluhu u baahan yahay.

Waxa jira kulliyado bulsho iyo kuwa gaar ah. Kulliyadaha bulshadu waa lacag yar yihiin. Dadka ku-nool gobolka ay dugsiga ka dhigtaan waxa la yidhaa dadka deggan. Dadka deggani dugsiyada gobolka waxay baxshaan lacag ka yar ardayda aan degganayn.

Kulliyadaha gaarka ahi waxay noqon karaan qaali lacag badan.

Kulliyada ayaa go'aansata cidda gali karta dugsigooda. Ardaydu waa in ay ruqsad codsadaan ay ku tagaan kulliyadda. Ardayda hesha ruqsaddaas ay ku gelayaan kulliyadda ayaa la "ogolaaday".

2. Ilmahaygu ma inuu galaa kulliyad si uu shaqo u helo?



Ilmahaagu uma baahna inuu galo kulliyad si uu u helo shaqo. Ilmahaagu wuu shaqayn karaa isagoon tegin kulliyad.

Haddii uu ilmahaagu rabo shaqo leh lacag wanaagsan ama xirfad gaar ah, ilmahaagu ha galo kulliyad. Shaqooyin badan ayaa u baahan waxbarsho kulliyadeed. Macnuhu waa ardaydu in ay dhammaysato kulliyadda si ay uga shaqeeyaan meelahaas.

Kala hadal ilmahaaga ku jira dugsiga dhexe iyo kan sare waxay ay rabaan in ay shaqo ka dhigtaan. Dabeedna la hadal la-taliyaha haga inuu ogaado in ay ilmahaagu rabaan in ay galaan kulliyad. La-taliyaha hagaa waa shaqaalahu dugsiga sare ee ka caawin kara ilmahaaga siduu ugu diyaar-garoobi lahaa gelista kulliyad ama shaqo.



Isku-diyaarinta Kulliyadda

3. Maxay kulliyaddu muhiim u tahay?

Kulliyaddu waa muhiim waayo waxay ilmahaaga ka caawisaa siduu u heli lahaa shaqo fiican. Haddii uu ilmahaagu tagi waayo kulliyad, waxa laga yaabaa inuu ilmahaagu ka shaqeeyo laba ama saddex shaqo si uu isaga bixiyo biilasha. Ameerika araday badan oo gala kulliyadda ayaa sameeya lacag ka badan kuwaan aan gelin kulliyadda.

Ardayu waxay ku bartaan kulliyadda xirfado shaqo. Xirfadahaasi waxay ka caawinyaan shaqaalaha in ay si fiican u gutaan shaqadooda.

4. Siduu ilmahaygu u dalban karaa kulliyadda?

Ugu horreyn waa inuu buuxiyo dalab. Dalabku waa foom kulliyadda uga warramaya ilmahaaga. Wuxu dalabku warsan ilmahaaga derejadiisa, edebtiisa, ciyaaraha iyo waxyaalo kale.

Ilmuu wuxu u diri dalabkaas waaxda ogolaanshaha ee kulliyadda. Waaxda ogolaanshuhu waa koox dad ah oo go'aamiya ardayda galaysa fasalada kulliyadda.

COMMON APPLICATION®
2003-2004

APPLICATION FOR UNDERGRADUATE ADMISSION
The member schools and individual members of the Association of American Colleges and Universities have determined that the college or university listed on this page is the college or university to which you are applying. If it is not a member of the Association of American Colleges and Universities, the college or university to which you are applying is not a member of the Association of American Colleges and Universities.

PERSONAL DATA

Legal Name _____ Sex _____ Age _____ Grade Completed _____

Address _____ City _____ State _____ Zip _____

Telephone _____ Email Address _____

Present Home Address _____ Street or Box Number _____

Telephone _____ City _____ State _____ Zip _____

If different from above, please give your mailing address for all academic correspondence _____

Mailing Address (home) _____ Street or Box Number _____

Telephone _____ City _____ State _____ Zip _____

Place of mailing address _____ Street or Box Number _____

Telephone _____ City _____ State _____ Zip _____

Place of residence _____ Street or Box Number _____

Telephone _____ City _____ State _____ Zip _____

Orientation: Freshman Transfer Other _____

Non-U.S. Permanent Resident Visa, validity of _____ Other (country) _____ / _____

Also Registration Number _____

If you are not a U.S. citizen and live in the United States, how long have you been in the country? _____

Please list any academic achievement or recognition _____

From college or former high school _____

From last two years of professional plans _____

"Will you be a candidate for financial aid?" Yes No If yes, the appropriate form(s) must be filed on _____

The following items are optional! The information you provide will be used to determine faculty interview.

Place of birth _____ Sex _____ Age _____ Grade Completed Number of sons _____

Place Languages spoken _____

If you wish to be identified with a particular ethnic group, please check all that apply

African American, Black Asian American, Asian Indian, Chinese, Japanese, Korean, Pacific Islander
 Native American, Alaskan Native, Inuit, etc. _____ Hispanic _____
 Arab, Middle Eastern, Persian _____ Other _____
 Hispanic, Latin American _____ White or Caucasian _____
 Hispanic, Latino, Mexican _____ Other rapidly _____

APP-1

Waa kuwan qaar ka mid ah waraaqaha uu ilmahaagu u dhiibayo kulliyadda:

- Shahaadada Dugsiga sare
- Dhibcaha imtixaanada SAT iyo ACT
- Tusaale qoraalo
- Ujrada dalabka

La-taliyaha haga ee ilmahaaga dugsigiisa sare ayaa ka caawin kara isku hagaajinta waraaqahaas. La-taliyaha haga ayaa ka jawaabi kara su'aalaha la xidhiidha kulliyadda iyo dalabka.

5. Waa maxay waraaqada qoraalka guursan dugsiga sare?



Shahaadada dugsiga sare waa waraaq muujinaysa ilmahaaga derajiisa dugsiga sare. Waxa kale oo ay muujisaa nooca fasalada uu qaatay iyo haddii uu edeb fiicnaa. Ilmahaagu ha warsado dugsiga sare inuu shahaadada toos ugu diro kulliyadda.



6. Maxay yihiin dhibcaha SAT iyo ACT?

Sannad kasta, ardayda dugsiyada sare waxa laga qaadaa imtixaan kulliyadda ah. Imtixaanadaasi waa SAT iyo ACT. Ilmahaagu wuxuu qaadan karaa SAT gu'ga uu yahay fasalka mid ka danbeeyo (markuu yahay 16 ama 17 jir). Wuxuu qaadan karaa ACT shan jeer sannadkii.

Kategori	Piisum	mark	markad	Yahay
Arabiyah	15-20	20%	20%	10%
Amheriyah	10-15	20%	20%	10%
Eritreyyah	10-15	20%	20%	10%
Gezira (D)	10-15	20%	20%	10%
Gezira (S)	10-15	20%	20%	10%
Habesha (D)	10-15	20%	20%	10%
Habesha (S)	10-15	20%	20%	10%
Harari (D)	10-15	20%	20%	10%
Harari (S)	10-15	20%	20%	10%
Hoole (D)	10-15	20%	20%	10%
Hoole (S)	10-15	20%	20%	10%
Ijebu (D)	10-15	20%	20%	10%
Ijebu (S)	10-15	20%	20%	10%
Jama' (D)	10-15	20%	20%	10%
Jama' (S)	10-15	20%	20%	10%
Kenya (D)	10-15	20%	20%	10%
Kenya (S)	10-15	20%	20%	10%
Liberia (D)	10-15	20%	20%	10%
Liberia (S)	10-15	20%	20%	10%
Mali (D)	10-15	20%	20%	10%
Mali (S)	10-15	20%	20%	10%
Niger (D)	10-15	20%	20%	10%
Niger (S)	10-15	20%	20%	10%
Sierra Leone (D)	10-15	20%	20%	10%
Sierra Leone (S)	10-15	20%	20%	10%
Togo (D)	10-15	20%	20%	10%
Togo (S)	10-15	20%	20%	10%
Uganda (D)	10-15	20%	20%	10%
Uganda (S)	10-15	20%	20%	10%
Zambia (D)	10-15	20%	20%	10%
Zambia (S)	10-15	20%	20%	10%

Imtixaanadu lacag ayey joogaan. Ilmaahaga waa laga dhaafi karaa SAT, waxaad ka ogaan kartaa dhaafitaanka ujrada SAT internetka:

<http://www.collegeboard.com/student/testing/sat/calenfees/feewaivers.html>

Dhibcaha ilmahaaga ee SAT iyo ACT waxay muujinayaan siduu uga shaqeeeyey. Kulliyaddu dhibcahaas ayey adeegsanayaan si ay u go'aansadaan inuu ilmahaagu geli karo kulliyadda.

Carruurta qaar ayaa qata casharro ka caawiya siday u heli lahaayeen SAT dhibco fiican. Princeton Review iyo Kaplan ayaa bixiya casharro u diyaariya ilmaha imtixaanka. Casharadaasi lacag badan ayey joogaan. Ilmahaagu ha warsado dugsiga liisyada casharada lacagta yar jooga.

7. Muxuu yahay qoraalka tusaalahi ahi?



Kulliyado badan ayaa warsada in ay ardaydu u soo dirto tusaale wax ay qoreen. Tusaalahani wuxu noqon karaa waraaq uu ku qoray ilmahaaga dugsiga sare. Ama mid kale oo cusub.

Tusaalahaha qoraalku wuxu muujiyaa ilmahaaga xirfadiisa Ingiriisida iyo sida uu u fekiro.

8. Immisa ayuu joogaa ujrada dalabku?



Dalabka kulliyaddu lacag ayuu joogaa. Wuxuu la yidhaa lacagtaas ujrada dalabka. Sida badan waxay tagtaa \$50 illaa \$100. Wuxaad ku bixin kartaa jeeg ama xawaalad. Lacagtaasi dib kuugo soo noqon mayso.

Warso kulliyadda dhaafitaan ujro. Macluumaad dheeraad ah oo la xidhiidha dugsiyada leh dhaafitaan ujro ka eeg:

http://www.collegeboard.com/prod_downloads/student/testing/sat/sat_fee_waiver_directory.pdf.


9. Maxaa dhacaya kadib marka ilmahaagu u diro waraaqaha kulliyadda?

Waaxda ogolaanshuu ayaa eegi doona ilmahaaga dalabkiisa. Waxay eegi doonaan derajadiisa iyo edebtiisa. Waxa kale oo ay fiirin waxqabadyada oo ilmahaagu ka qaban jiray dugsiiga dibeddiisa.

Waaxda Ogolaanshahu waxay fiirin doonaan tusaalaha ilmahaaga qoraalkiisa. Waxa laga yaaba in ay ilmahaaga ugu yeedhaan waraysi.



Bilo kadib waxay go'aamin doonaan inuu ilmahaagu geli karo kulliyadda. Haddii ay ogolaansho siiyan uu ku galo kulliyadda, ilmahaaga waa la aqbalay.



Kulliyaddu way diidi kartaa ilmahaaga dalabkiisa. Macnaheedu waa ilmahaagu ma geli karo kulliyadda sannadkan. Waa dalban karaan mar kale sannadka xiga.

10. Maxay waaxda ogolaanshuhu ka eegaan dalabka?

Waaxda ogolaanshuhu waxay eegtaan ardayda fiican. Waxay jecel yihiin inay ku arkaan shahadadda A iyo B. Taas macnaheedu waxay jecelyihiin dhibcaha u dhaxeeya 80-100. Wuxuu qof shaqo badan. Taas waxay muujinaysaa inuu ilmahaagu yahay qof shaqo badan.

Ma rabaan in ay arkaan ilmahaaga oo edeb-darrooday, la xayiray ama laga eryey dugsiga. Taasi waxay ku adkayn doontaa ilmahaaga gelitaanka kulliyadda. Taas macanaheedu ma aha ilmahaagu ma geli karo kulliyadda.

Waxa kale oo ay fiiriyaan haddii ilmuu leeyaya karti gaar ah Kartida gaarka ahi waa wax uu ilmuu si fiican u sameeyo. Waa kuwan tusaale kartida gaarka ah ee ay kulliyaduhu eegaan:

- Ku-ffican ciyaaraha (sida kubadda cagata ama orodka)
- Ciyarta qalabka (sida durmaanka)
- Lambarada iyo luqadaha uu ku hadlo ilmahaagu
- Karti farshaxanimo (sida qaaddida sawirkaiyo rinjiyeynta)

Kulliyaduhu waxay jecel yihiin ardayda u shaqeeya bulshadooda. Taas waxa la-yidhaa shaqo bulsho. Waxay eegaan ardayda ku jirta kooxaha, kuwa ku hawlan kaniisadda, masaajidka iyo synagogue, ama kuwa gargaara dadka lacag la'aan.

11. Maxaa dhacaya haddii ilmahayga loo ogolaado kulliyadda?

Haddii ilmahaaga loo ogolaado kulliyadda waa inaad u-sheegto waaxda ogolaanshaa haddii uu is-qorayo ilmahaagu. Hadii ilmahaagu is-qoro waa inaad dugsiga u-dirtaa debaaji. Debaajigu wuxuu dabooli doonaa qayb ka mid kharashka dugsiga.



12. Sidee buu ilmahaygu ku xulan karaa kulliyadda sax ah?

Xulashada kulliyaddu waxay qaadan kartaa muddo. Waxa idin caawin kara haddii uu ilmahaagu garanayo shaqada uu rabo inuu qabto. Ilmahaagu waa inuu ka sii fekiro inta uu ku jiro dugsiga dhexe.

Dugsiga dhexe ilmahaagu waa inuu la kulmo la-taliyaha haga oo bartaa fasalada fiican inuu u qaato kulliyada. Ilmaahaagu waa inuu xoog uga shaqeeyo fasaladaas.

Isku-diyaarinta Kulliyadda

Markuu ilmahaagu ku jiro fasalka 10 ama 11, adiga iyo isagu waa inaad sii baadhaan kulliyadaha. Waxaad macluumaadka kulliyadaha ka eegi kartaan internetka. Adiga iyo ilmahaagu waad booqan kartaan dugsiga. Waad la hadli kartaa macalimiinta iyo ardayda si aad u go'aansataan haddii uu dugsigu ku habboon yahay ilmahaaga.

Waa kuwan su'aalaha aad weydiin karto waaxda ogolaanshaha ee kullidaha:

- Waa maxay shahaadadda jamaacadeed ee ay kulliyaddu bixisaa?**
- Waa maxay barnaamijyada ugu fiican fursadda shaqadu?**
- Intee le'eg yahay dugsigu?**
- Intee le'eg yihiin fasaldu?**
- Waa maxay waxqabadyada iyo barnaamijyada kale ee dugsigu siin karaa ilmahayga?**
- I misa ayuu tagayaa kharashku sannadkii?**
- Waa maxay deeqda waxbarasho ee ilmahaygu heli karaa?**

Waa muhiim in ilmahaagu xusho kulliyadda ka caawin karta siduu ku baran lahaa xirfadda looga baahan yahay shaqada.

Waxa kale oo muhiim inaad ka fekiro sidii qoyskaagu u bixin lahaayeen kulliyadda. Haddii kulliyadaha oo dhambi qaali kugu noqdaan, wuxu ilmahaagu geli karaa kulliyad bulsho. Kulliyadda bulshadu waa ka lacag yar tahay. Labo sanno kadib ayuu ku wareegi karaa jaamicad.

13. Waa imisa qiimaha kulliyaddu?

Kulliyad kastaa waxay leedahay qiimo gooni ah. Kulliyadaha bulshada iyo kuwa dadweynaha ayaa lacag yar kuwan gaarka ah. Waa kuwan kharashyada kulliyadaha qaar ka mid ahi:

- Lacagta waxbarashada oo ah qiimaha casharrada
- Ujrada looga baahan yahay gelista kulliyadda
- Kharashka qol/guri uu ku nooladdao kulliyadda
- Cuntada
- Buugaagta iyo qalabka
- Kharshka qofka sida casharada gu'gii, ciyaaraha iyo xaaladda degdeg ah
- Gaadiidka baska ama baabuur haddii ilmahaagu ku nool yahay kulliyadda oo uu rabo inuu u soo safro guriga

Kulliyad kasta waxay leedahay waaxda gargaarka dhaqaale. Kuwaasi waa dad ka shaqeeya siday kuu caawin lahaayeen inaad isaga bixiso kharashka kulliyadda.

14. Sidee ayaanu isaga bixin karnaa kulliyadda?

Waxa jira siyaabo dhawr ah oo kaa gargaaraya sidaad isaga bixin lahayd kulliyadda. Ilmahaagu wuxu heli karaa:

- Deeq iyo deeq waxbarasho
- Abaalmarin shaqada waxbarashada
- Amaah

15. Maxay tahay deeq amd deeq waxbarasho?



Deeq iyo deeqda waxbarasho waa lacag aanad dib u celinayn.

Ilmahaagu wuu heli karaa deeq ama deeq waxbarasho haddii uu yahay arday fiican ama u baahan yahay lacag uu ku galu dugsi. Kulliyaduhu waxay xaashida warbixinta ka eegaan derejada A iyo fasalada adag. Ilmahaagu waxa kale uu heli karaa deeq haddii uu leeyahay xirfado dabiici ah. Ilmahaagu wuu u baahan karaa inuu dalbado deeq waxbarasho.

Meelaha kale ee laga helo deeqda waxbarashada:

- Makniisadaha iyo ururada diiniga ah
- Ururada Bulshada sida Rotary Club
- Meelaha waalidku ka shaqeeyaan (loo-shaqqeeyaha)
- Maamulka Dadkii hore ciidamada ugu jiray (VA)ee carruurta waalidkoodu ciidamada ahaan jireen
- Adeegyada Dib-ugu-noqashada Shaqada
- Deeqla waxbarashada ee ROTC haddii uu ilmahaagu ku jiro “Reserve Officer’s Training Corps” ee ciidamada
- Ururada gargaarka sida kan Coca Cola ama Ururka Neefta
- Ilmahaagu wuxuu dee qaxbarsho ku heli karaa ciyaara, musiq ama farshaxan.
- La-taliyaha haga ee ilmahaaga dugsigiisa sare ayaa haya liistada deeqaha waxbarasho ee caamka ah ee la siiyo ardayda ka baxaysa dugsiga sare. La hadal la-taliyaha haga ee ilmahaaga.

16. Waamaxay shaqo tacliimeed?

Shaqo tacliimeed waa marka uu ilmahaagu isla mar wado shaqo iyo waxbarasho kulliyad. Ilmahaagu wuxu u shaqeeyaa kulliyadda. Lacaktu shaqaysto wuxu ku bixiyaa casharrada. Kala hadal waaxda gargaarka dhaqaalaha arrinta shaqada tacliimeed.



17. Waa maxay amaahdu?

Amaah waa lacag loo baahan yahay inaad dib u bixiso.

Adiga iyo ilmahaagu waa inaad ka fekirtaan inta amaah aad u baahan tiiin. Haddii uu ilmahaagu heli karo shaqo lacag badan, waa fiican tahay inaad amah qaadataan. Waxay samayn doonaan lacag ku filan inay deynta isaga baxshaan.

18. Sidee ilmahaygu ku heli karaa garagaar dhaqaale ama deyn?



Isla-marka uu ilmahaagu dalbanayo kulliyadda, waa inuu buuxiyaa dalabka Gargaarka Federaalka ee Ardayda. Kaas waxa la yidhaahdaa FAFSA. Ilmahaagu wuxu ku samyn karaa kombutuutarka ama waraaq. Boggu waa www.fafsa.ed.gov.

Ilmahaagu waxa kale uu tagi karaa xafiiska garaagrka dhaqaalaha oo codsan karaa in laga caawiyo buuxitaanka FAFSA. Dabayaaqada tuducdan ka eeg talooyin sida loo buuxiyo gargaarka dhaqaale.

Carruurta qaxootiga ahi waa heli karaan amaah. Dhaliyarada qaxootiga ah ee dalbanaya amaahdu waa in ay:

- Buuxiyaan oo diraan Dalabk Bilaashka ah ee Gargaarka Federaalka ah ee Aradayda (FAFSA)
- Muujiyaan inay yihii ajnabi u qalma (qaxooti ama soo-galyti) oo qadimaan xaashidooda I-94
- Muujiyaan lambarkooda sooshiyalka “Social Security Number”
- Ku qoran yihii ugu yaraan wakhti-badhkiis ama loo ogolaaday barnaamij la ogol yahay oo ay ku heli karaan shahaadad jaamicadeed ama shaqo.
- Haystaan shahaado dugsi sare ama shahaadadda “General Education Development (GED)” ama ka gudbeen imtixaan laga ogol yahay Waaxda Waxbarashada ee Ameerika
- Sameeyeen horumar waxbarasho oo laga raali-yahay
- Diiwangeliyaan “Selective Service” (raggaa oo keli ah18-25)
- La hadlaan la-taliyaha haga si ay u hubiyaan in ilmahaagu u baahan yahay waraaqo dheeraad ka arday-qaxooti ah ahaan.

Dawladdu waxay kuu sheegi doontaa haddii ilmahaagu xaq u leeyahay amahda. Wuxuu kuu sheegi doonaa qaddarka uu ilmahaagu amaahan karo.

Isku-diyaarinta Kulliyadda

Muxuu waalidku bixin kara + Muxuu ilmuuhu bixin kara = Muxuu qoysku bixin kara



Waxay fiirin karaan qiimaha dugsiga iyo inta waalidku bixin karo si ay u qeexaan amaahda:

Qiimaha dugsiga - Muxuu qoysku bixin karaa = Amaah



Xusuuso, lacagtlu waa amah la rabo inaad bixiso.

Adiga iyo ilmahaagu waa inaad fahamtaan qiimaha dugsigu joogo hal sanno. Kulliyadda warso gargaar haddii aanad ogayn qaddarka lacagta ee ilmahaagu u baahan doono.

Sannad kasta oo uu ilmahaagu tago dugsiga ee u baahan yahay lacag waa inuu buuxiyo foomka FAFSA.

Fadlan ka eeg dabayaqaada tuducdan laba dhokomenti oo ka caawin kara adiga iyo ilmahaaga buuxinta gargaarka dhaqaalaha:

- Tallaabooyinka Buuxinta FAFSA
- Liiska warbixinta ee Gargaarka Dhaqaalaha

19. Sideen u bilaabaa kala-hadalka ilmahayga ee kulliyadda?

Marku ilmahaagu ku jiro dugsiga dhexe iyo kan sare, waa inaad kala sheekaysataa wuxuu rabo inuu ka shaqeeyo. Dugsiga sare, waa inaad adiga iyo ilmahaagu baadhaan oo booqataan kulliyado.

Isku-diyaarinta Kulliyadda

Kala hadal ilmahaaga wuxu ku naaloodo. Ka caawi shaqadiisa guriga. Hubi inuu yahay arday fiican.

Carruur badan oo ku jira dugsiga sare ayaa bilaaba inay ka fekiraan inta ay lacag u baahan yihii si ay u gataan waxyaabaha ay rabaan. Taas waa fursad fiican oo aad kala hadli karto shaqooyinka, dakhliga iyo kharashka. Wuxu u baahan yahay ilmahaagu lacag ku filan inuu isaga bixiyo biilasha, u kaydsado xaaldaha degdeg ah oo isaga bixiyo waxyaabaha uu rabo. Taas waxa laga yaabaa inay ka caawisaa ilmahaaga in uu doorto mihnad.

Qaddarka lacagta ah ee shaqaalaha la siiyo sannadkii waxa la yidhaa mushahar. Mushaharadu waxay ku kala duwan yihii xirfadda looga baahan yahay shaqada. Mushaharooyinku waxa kale oo ay ku kala duwanaan karaan sharikadda iyo meesha. Meelaha wakhtiga buuxa laga shaqeeyo waxay leeyihii dheef ay ku jirto caymis caafimaad, caymis nololeed iyo qorshe kayd.

Marar badan, mushahaarada ay ardayda haysata dibloomaha koobaad ee jaamicadda (kulliyad afar-sanno ah) waa ka badan yahay kuwan haysta dibloomaha kulliyadda (kulliyad laba-sanno ah). Mushaharooyinku waa cashuurta ka hor.

MUSHAHAAARADA LAGU BILAABO EE DIBLOOMAYAASHA:

	Dibloome labo-sanno ah ¹	Dibloomaha afar-sanno ²
Xisaabiye	Lama-hayo	\$44,500/sannadkii
Macalin/tacliinta	19,000	30,000/sannadkii
libiye		37,000
Sayniska Barnaamij-dejinta Kombutarka	29,000	54,000
Caafimaadka/kalkaaliye sare	35,000	39,000
Maamulka Ganacsi/Suuq-gelinta	25,000	33,000
Amniga	27,000	N/A
Aqonta Guud ee cilmiga ahayn	22,000	27,000

¹ "Starting Salary Expectations." JobWeb. Dec. 2006.

<http://www.jobweb.com/resources/library/Salary_and_Benefits/Starting_Salary_51_01.htm>

² "Lucrative Degrees for College Grads." CNNMoney.com. April, 19, 2005. Sept. 2006.

<http://money.cnn.com/2005/04/15/pf/college/startng_salaries/index.htm?cnn=yes>

Isku-diyaarinta Kulliyadda

Tallaabooyinka Buuxinta FAFSA

Tallaabo 1: Soo-qaado dalabka Bilaashka ah ee (FAFSA) ee ku habboon sannad dugsiyedka uu ilmaahgu rabo inuu galo dugsiga.

Waxaad isticmaali kartaa foomka internetka ama mid waraaq ah. Wixa fiican inaad sii buuxiso xaashi shaqo oo ka sii horraysiin ah si ay kaaga gargaarto buuxinta FAFSA.

Tallaabo 2: Buuxi FAFSA dhammaanteed. Hubi inaad ka jawaabto su'aalkasta. Qof ku caawiya raadso. Wac ama u tag xafiiska gargaarka dhaqaalaha haddii aad su'aal qabto ama aad rabto gargaar.

Tallaabo 3: Dir ama dhiib FAFSA. Ha la dirin foomamka cashuurta iyo waraaqo kale dalabkaaga.

FAFSA-da aad hadda dirtay ama dhiibtay waa dalabkaaga Deeqda Federaalka ah ee Pell waana tallaabada ugu horreysa ee habka uu ardaygu ku helo amahda.

Tallaabo 4: Marka laga shaqeeyo dalabkaaga, waxaad heli doontaa Warbixinta Gargaarka Ardayga. Dugsiyada aad ku qortay FAFSA waxay heli doonaan isla macluumaadkaas oo waa kula soo xidhiidhi doonaan haddii ay u baahdaan waraaqo kale si ay u dhammeeyaan gargaarkaaga dhaqaale. Haddii aanad ku qorin kulliyaddu FAFSA-daada, adiga ayey ku xidhan tahay sidaad kulliyadda ugu diri lahayd warbixinta gargaarka Ardayga.

Tallaabo 5: Kadib marka ay xafiiska gargaarka Dhaqaaluhu dhammeeyaan ee ka shaqeeyaan waraqahaaga gargaarka dhaqaalaha, waxa lagu soo ogeysiin doonaa haddii lagu ogolaaday Deeqda Pell. Haddii aad danaynaysid xataa waxaad ka codsankartaa lacagta daynta ah

Liistada Waxqabadka ee Gargaarka Dhaqaale

HUBI IN AAD:

- U baahan tahay gargaar dhaqaale
- Ka shaqaynayso (ama qorshaynayso) shahaadad jaamicadeed ama shahaado barnaamij u qalma
- Tahay muwaadin Maraykan ah ama uqalama aan muwaadin ahayn(qaxooti ama maqangaliyo haysta)
- Haysato Sooshiyal lambar sax ah "Social Security Number"
- Ka-diiwan gashantahay "Selective Service" (haddii loo baahdo)
- Ilaaliso helitaan horumar waxbarasho oo fiican

Isku-diyaarinta Kulliyadda

- Caddayso inaan lagugu lahayn amahda ardayga ee ferderaalka ama deyn lagaga lahayn deeqda ardayga ee federaalka
- Caddayso inaad inaad gargaarka u adeegsanayso waxbarsho qudha
- Dib u fiiriso Warbixintaada Gargaarka Ardayga (SAR)
- Hubiso macluumaaadka FAFSA – hubiso in ay sax yihiin!
- Ku jirto qaybta laga filayo qoyska (EFC)
- La-xidhiidho xafiiska Gargaarka ee Gargaarka Dhaqaalaha ee dugsiga aad rabto inaad gasho si aad u hubiso inaad haysato waraaqaha aad u bahan tahay

THE FAFSA – FOOMKA GARGAARKA DHAQALAHADH ARDAYGA:

- Ka buuxi Dalab Internetka www.fafsa.ed.gov
- Buuxi XAASHIDA FAFSA. Waxaad ka heli kartaa foomka:
 - Xafiiska La-taliyaha Haga
 - Xafiiska Gargaarka Dhaqaalaha ee Kulliyadda
 - Kaydka Buugaagta ee Xaafadda
 - Xarunta Federaalka ee Macluumaaadka Gargaarka Ardayda (1-800-4-FED-AID)
- Si aad U-buuxiso FAFSA, Waaad u Baahantahay:
 - Lambarka Sooshiyalka “Social Security Number”
 - Lambarka Ruqsadda Waddida Baabuurka (haddi aad leedahay)
 - Foomamka W-2
 - Cashuurta “Federal Income Tax Return”
 - Bayaan Bangiga oo Cusub iyo Xogta Kaydkaaga iyo Maaligelin kale
 - Xogta kale ee Dakhliga aan la canshuurin sida “Social Security, Lacgat caydha ee (TANF), ama Work First.
 - Lambarka Imigarashaynka “Alien Registration Number”
 - Haddii aad tahay Arday Qof-ku-taagersan, waaad u baahan tahay lambarka sooshiyalka “Social Security” ee waalidkaa iyo dakhliga iyo Xogta Dhaqaale.

LIFAAQYADA: IS-GAARSIINTA

La-xidhiidhka dugsigu wuxuu ilmahaaga dhawri karaa ammaankiisa oo ka gargaari karaa in ay noqdaan arday fiican. Tuduudani waxay ku siin doontaa siyaabaha aad Ingiriisi ugula xidhiidhi karto ilmahaaga dugsigiisa. (Tusaalooyinkani waa ka duwan yihiin nidaamka dugsiga.) Tusaalooyinkani waa gundhig waxana loo adeegsan karaa is-gaadhsiinta waxyaabaha yaryar. Wada-hadalka waxaad codsan kartaa turjumaan.

Tusaalooyinka tuducdani waxay u qaybsan yihiin kooxo. Tusaalaha hore waa afkaaga. Tusaalaha danbeyana waa Ingiriisi.

Waxa ku jira tusaalooyinka kalmado iyo odhaahyo aad u baahnayso si aad ugu buuxiso. Kalmadahaas iyo odhaahyadaas waxa xukuma sababta aad ula xidhiidhayso dugsiga. Xidhiidh kasta, waa inaad bixisaa magacaaga iyo ilmahaaga magaciisa.

Adeegso tusaalaha soo socda, ku buusi magacaaga iyo ilmahaaga magaciisa.

Dear Teacher,

My name is _____ . I am _____ 's parent.

Waxa kale oo aad u baahanaysaa inaad dugsiga u sheegto sababta aad ugu qorayso am aula hadlayso. Waxaad u-sheegi kartaa:

- Ilmahaaga baa jirran oo aan imanayn dugsiga,
- Ilmahaagii dhib ayaa ka haysata shaqada guriga ama
- Inaad rabto inaad ballan kulan la qabsato macalinkaoo aad u baahan tahay turjumaan.

Markasta u-sheeg lambarka telefonkaaga. Waxaad xasuusin kartaa inaad baranayso Ingiriisida oo Turjumaan kaa caawin karo is-gaadhsiinta.

LIFAAQA 1: Codsiga Turjumaan

Raac nidaamkadugsiga ee codsiga turjumaanka. Tusaalooyinkani waxay muujinayaan waxaad ku odhan karto qofka qaada ballanada turjumaanada.

Waxaad adeegsan kartaa tusaalahsan si aad u codsato turjumaan kulanka aad la leedahay macalinka ama shaqaalaha kale ee dugsiga. Wuxaan ku istcmaali kartaa hadalka telefonka ama markaad tagto dugsiga.

1. Wada-hadalka: Codsiga Turjumaanr (T)

Adiga: Nabad, magacaygu waa _____.

I Imahayga, (magacaaga)

_____ wuxu ku jiraa _____ fasalkiisa. Waxaan (magaca ilmaha) (macalinka magaciisa)

U baahanahay turjumaan _____. (sababta baahida turjumaanka)

Xoghayaha: Hagaag. Afkeed ku rabtaa?

Adiga: waxaan ku hadlaa _____.
(afkaaga)

Xoghayaha: Ma ogtahaya goorta kulankiinu yahay?

Adiga: _____.
(haa/maya)

Xoghayaha: Hagaag, waxaan la hadli macalinka oo aan kuu ballamindoona turumaan. Waa maxay telefon lambarkaagu?

Adiga: Lambarka telefonkaygu waa _____. Mahadsanid.
(lambarka telefonkaaga)

Xoghayaha: Adigaa mudan. Nabadeey.

Lifaaqyada

1.B Hadal: Codsi turjumaan (Ingiriisi)

You: Hi, my name is _____.
(your name)
_____ is in _____'s class. I need an
(child's name) (teacher's name)
interpreter for/to _____.
(why you need an interpreter)

Secretary: Okay. What language do you need?

You: I speak _____.
(your language)

Secretary: Do you know when your meeting is?

You: _____.
(yes/no)

Secretary: Okay, I will talk with the teacher and schedule
an interpreter. What is your phone number?

You: My phone number is _____. Thank you.
(your phone number)

Secretary: You're welcome. Goodbye.

LIFAAQA 2: Codsi turjumaan

Waxa kale oo aad qoraal ahaan ku dalban kartaa turjumaan. Waa kan soo socda tusaale sida loo qoro codsi turjumaan.

2.A Waraaq: Codsi turjumaan (T)

(taariikhda)

Gacaliye _____,
(Magaca macalinka)

Waxan ahay _____ waalkiis. Waxaan doonayaa inaan
(ilmaha magaciisa)

Kaala hadlo _____ laakiin waxaan u baahan
(waxad ka hadlayso)
ahay turjumaan ku hadla af _____.
(afkaaga)

Fadlan ii qabo ballan oo ii soo sheeg goorta aan kulmi karno.
Lambarka telefonkaygu waa

_____.
(lambarka telefonka)

Mahadsanid,

(magacaaga)

Lifaaqyada

2.B Waraaq: Codsiga Turjumaan (Ingiriisi)

(date)

Dear _____,
(teacher's name)

I am _____'s parent. I would like to talk
(child's name)
to you about _____ but will need an
(what you want to talk about)
interpreter who speaks _____.
(your language)

Please schedule a meeting and let me know when I should
meet you. My telephone number is

_____.
(phone number)

Thank you,

(your name)



LIFAAQA 3: Codsiga La-kulanka Macalinka/Shaqaalaha Dugsiga

- Waa inaad ballan qabsataa si aad ula kulanta ilmahaaga macalinkiisa.
- Waxaad kala hadli kartaa:
- Ilmahaaga shaqadiisa ama edebtiisa dugsiga
- Su'aalo aad ka qabto dugsiga
- Caawinta ilmahaaga isu-diyaarinta kulliyadda
- Haddii aad baranayso Ingiriisida, waxaad codsan kartaa turjumaan. Hubi inaad ku darto codsigaaga waraaqda. Tusaalaha soo socdaa waa waraaq aad adeegsan karto codsiga kulanka macalinka ama shaqaalaha dugsiga.

3. Waraaq: Codisga Kulanka (T)

(taariikhda)

Gacaliye _____,
(magaca macalinka/shaqaalha dugsiga)

Waxan ahay _____ waalidkiis. Waxan rabaa in
(magaca ilmaha)

Aan kula kulmo oo kaala hadlo _____.
(wxaad kala hadlayso)

Fadlan ii ballami kulanka turumaan ku hadla
_____. Fadlan turjumaanku ha I soo
(afkaaga)

Waco si uu iigu qabto ballanka. Telefon lambarkaygu
waa _____.
(Lambaraka telefonkaaga)

Mahadsanid,

(magacaaga)

Lifaaqyada

3.B Waraaq: Codsiga Kulanka (T)

(taariikhda)

Gacaliye _____,
(magaca macalinka/shaqaalha dugsiga)

Waxan ahay _____ waalidkiis. Waxan rabaa in
(magaca ilmaha)

Aan kula kulmo oo kaala hadlo _____.
(wxaad kala hadlayso)

Fadlan ii ballami kulanka turumaan ku hadla
_____. Fadlan turjumaanku ha I soo
(afkaaga)

Waco si uu iigu qabto ballanka. Telefon lambarkaygu
waa _____.
(Lambaraka telefonkaaga)

Mahadsanid,

(magacaaga)

LIFAAQA 4: CUDUR-DAAR MAQNAANSHO

Waa inaad dugsiga u-sheegto marka uu ilmaahagu jirrado ee guriga joogayo. Tusaalaha soo socdaa waa hadalka aad la yeelan karto dugsiga markaad rabto inaad u-sheegto in uu ilmahaagu guriga ku nagaadayo oo jirran yahay.

4. Hadal: Ilmaha jirran ee maqan (T)

Adiga: Nabad, magacaygu_____ . I Imahaygu
(magacaaga)

Wuu jirran yahay maanta.

Secretary: Waa maxay ilmahaaga magaciisu?

Adiga: Magaceedu/iisu waa _____.
(magaca ilmaha)

Xoghayaha: Waa kuma ilmahaaga macalinkiisu?

Adiga: I Imahayga macalinkiisu waa _____.
(magaca ilmahaaga macalinkiisa)

Xoghayaha: I misa beri ayuu maqnaanayaa ilmahaagu?

Adiga: Wuxu dugsiga imaanaya

_____.
(maalinta uu ilmuu ku soo noqonayo dugsiga)

Xoghayaha: hagaag. Waan u-sheegi macalinka. I Ilmahaagu wuu kala hadlikaraa macalinkiisa shaqadii ka baaqatay intuu maqnaa.

Adiga: Wuu yeeli doonaa. mahadsanid. Nabadeey.

Xoghayaha: nabadeey.

Lifaaqyada

4.B Wada-hadal: Ilmaha ayaa jirran oo maqan (Ingiriisi)

You: Hi, my name is _____.
(your name)

today.

Secretary: What is your child's name?

You: His/her name is _____.
(your child's name)

Secretary: Who is your child's teacher?

You: My child's teacher is _____.
(name of your child's teacher)

Secretary: How long will your child be out of school?

You: He/she will be in school _____.
(the date your child will return to school)

Secretary: Okay. I will tell the teacher. Your child can talk to his/her teacher about the work he missed.

You: He/she will. Thank you. Goodbye.

Secretary: Goodbye.



LIFAAQA 5: Cudur-daar maqnaansho

Markuu ilmahaagu dugsiga ku soo noqdo waraaq baad u qori kartaa macalinkiisa maqnaanshihiisa. Taas waxa la yidhaa cudur-daar maqnaansho.

5. Waraaq: Cudur-daar maqnaansho (T)

(taariikhda)

Gacaliye _____,
(magaca macalinka)

Fadlan raali ka noqda_____maqnaashihiisa. Wuu
(magaca ilmahaaga)
jirranaa. Wuu fiican yahay maanta.

Fadlan kala hadal ilmahayga shaqadii ka baaqatay. Fadlan u-sheeg _____ markaad rabto inuu dhammeeyo
(magaca ilmaha)
shaqada.

Mahadsanid,

(magacaaga)



Lifaaqyada

5.B Waraaqr: Cudurdaar maqnaansho (Ingiriisi)

(date)

Dear _____,
(teacher's name)

Please excuse _____'s absence. He/she was
(your child's name)
sick. He/she is better today.

Please talk to my child about the work he/she missed.
Please also tell _____ when you want him/her to
(child's name)
finish the work.

Thank you,

(your name)



Lifaaqyada

LIFAAQA 6: Ilmaha xanuunsan u baahan in Daawo ku qaataan iskuulka.

Haddii ilmahaagu xanuunsanyahay, asaga/ayada laga yaabo inay ku qaadato daawo iskuulka. Kalkaaliyaha iskuulka uma ogalaanayo in ilmahaagu ku qaato daawo iskuulka asaga ama ayada haddii warqad ka haysato dhakhtarka mooyaane.

Waxaad u baahantahay in aad u sheeqtid iskuulka in ilmahaaga u baahanayahay inuu daawo qaato markuu joogo iskuulka ilmahaygana wuxuu ka haystaa dhakhtarka warqad.

Tusaalaha soo socdaa waa hadalka aad la yeelan karto dugsiga markaad rabto inaad u-sheegto hoghayaha iskuulka.

6.A Wicid: Ilmahayga wuxu ubaahanayahay inuu dawo ku qaato iskuulka (T)

Adiga : Nabad, magacaygu _____ . ilmahaygu
(your name)

_____, wuxuu ku jiraa

_____ fasalkiisa. Dhakhtarka wuxuu asaga/da
(magaca macalinka)

wuxu u baahanyahay inuu daawo

(child's name))

_____ wuxuuna warqad ka haystaa

(magaca ilmaha)

dhakhtarka.

hoghaya: hagaag. Ilmahaga waxay willka/gabadha waxay in inay keenaan warqada dhakhtarka .Kalkaaliyaha way u wici doontaa inay daawada qaataan.

6.B Telefon: Ilamaha oo u baahan inuu daawo ku qaato dugsiga (Ingiriisi)

You: Hi, my name is _____ . My child,
(your name)
_____, is in _____'s class. The
(child's name) (teacher's name)

doctor says he/she needs to take medicine.

_____ has a note from the doctor.
(child's name)

Secretary: Thank you. Your son/daughter needs to show us the note. The nurse will call him/her to take the medicine.

You: Thank you.

Secretary: You're welcome. Goodbye.

LIFAAQA 7: Cudur-daar Daahitaan

Haddii uu ilmahaagu ka daaho dugsigal, waa inaad u-sheegto dugsiga. Waad wici kartaa dugsiga ama waraaq ayaad u dhiibi karta ilmaha. Waa inaad u-sheegto dugsiga wuxu ilmuu u daahay iyo goorta uu imanayo dugsiga.

Tusaalahaa soo socdaa waa hadalka idin dhixmari kara adiga iyo xoghayaha dugsiga ee ku saabsan daahitaanka ilmaha.

7. Telefon: Daahidda imaatinka ilmaha (T)

Adiga: Nabad. Magacaygu waa _____ . I Ilmahayga

(magacaaga)

_____, eek u jira _____ fasalkiisa.

(magaca ilmaha)

(macalinka magaciisa)

Wuu ka daahaya dugsiga maanta. Annagu

_____. Wuxu

(sababta uu ilmahaagu u daahayo)

imaan doonaa dugsiga _____ .

(wakhtiga)

Xogahaya: Mahadsanid wicitaanka. Waa u sheegi doonaa

(magaca macalinka)

I n ilmahaagu fasalaka imaanayo _____ .

(wakhtiga)

Lifaaqyada

7.B Phone: Daahitaanka ilmaha (Ingiiriisi)

You: Hi, my name is _____ . My child,
(your name)
_____, is in _____ 's class.
(child's name) (teacher's name)

He/she will be late to school today. We
_____. He/she
(why your child is late)

will be to school by _____.
(time)

Secretary: Thank you for calling. I will tell _____
(teacher's name)
your child will be in class at _____.
(time)



LIFAAQA 8: Cudur-daar Daahitaan

Waxa kale oo aad u-qori kartaa macalinka ama xoghayaha dugsiga waraaq aad ugu sheegayso sababta uu ilmuu u daahay. Waa kan tusaalaha waraaqdu.

8. Waraaq : Cudur-daar daahitaan (T)

Gacaliye _____,	(taariikhda)
Fadlan raali ka noqo_____	daahitaankiisa. (your child's name)
Annagu_____	aroortan. (sababta uu ilmahaagu u daahay)
Mahadsanid, _____ (magacaaga)	

Lifaaqyada

8.B Waraaq: Cudur-daar daahitaan (Ingiriisi)

Dear _____,	(date)
(teacher's name)	
Please excuse _____ for being late. We	
(your child's name)	
_____ this morning.	
(why your child is late)	
Thank you,	
_____ (your name)	



LIFAAQ 9: Hore u bixid

Ilmahaagu hore dugsiga waa uga bixi karaa ballan dhakhtar awgeed. Waa inaad u-sheegto dugsiga goorta ilmahaagu baxayo, sababta iyo qofka ka qaadaya dugsiga. Taas waxa la yidhaahdaa cudur-daar hore u bixid. Dugsigu u ogolaan mayo ilmahaaga inuu hore u baxo haddii aan waraaq lagaa helin. Dugsigu u ogolaan mayo in qofaan ahayn kan ku qoran warqaddu inuu ilmaha kaxeeyo.

Tusaalaha soo socdaa waa codsi hore u bixid.

9. Waraaq: Codsi hore u bixid (T)

(taariikhda)

Gacaliye _____,
(magaca macalinka)

I Imahayaga_____, wuxu u baahan yahay inuu hore
(magaca ilmaha)
u baxo maanta. Wuxu leeyahay ballan dhakhtar. Fadlan sii
daaya _____. _____ aya ka
(wakhtiga) (magaca qofka)

qaadi doona dugsiga.

Mahadsanid,

(magacaaga)

Lifaaqyada

9.B Waraaq: Codsi hore u-sii-dayn (Ingiriisi)

<p>Dear _____, (teacher's name)</p> <p>My child, _____, needs to leave school early (child's name) today. He/she has a doctor's appointment. Please excuse him/her at _____. _____ will pick (time) (name of person) him/her up from school.</p> <p>Thank you,</p> <p>_____ (your name)</p>	_____ (date)
---	-----------------

LIFAAQA 10: Codsiga Dalabka Dhaafitaanka Ujrada Qadada ama Lacag la'aanta ah

Dugsiyo badan ayaa ka dhaafa ujrada waxqabadyada dugsiga. Si aad u hesho dhaafitaankaas ama qadada lacag la'aanta ah, waa inaad dalbato.

Tusaalaha soo socdaa waa sida looga codsado dalabka xoghayaha ama macalinka.

10. Waraaq: codsi dhaafitaan ujro ama dalab qado bilaash ah (T)

_____ (taariikhda)

Gacaliye _____,
(magaca maclinka/xoghayaha)

Waxaan rabaa dalab ah _____.
(dhaafitaan ujro/barnaamijka qado bilaash ah)

Fadlan iigu soo dir guriga dalabka iyo fariimaha
_____.
(magaca ilmaha)

Mahadsanid,

(magacaaga)

Lifaaqyada

10.B Waraaq: codsiga dhaafitaanka ujrada ama dalabka qado bilaash ah (Ingiriisi)

<p>Dear _____, (teacher's/secretary's name)</p> <p>I would like an application for _____. (fee waiver/free lunch program)</p> <p>Please send the application and instructions home with _____. (child's name)</p> <p>Thank you,</p> <p>_____</p> <p>(your name)</p>	_____ (date)
---	-----------------

LIFAAQA 11:Codsiga Barnaamijyada Qoysaska Baranaya Ingiriisida

Dugsiyada qaarkood ayaa siiya gargaar gaar ah qoysaska baranaya Ingiriisida. Waad warsan kartaa barnaamijyadaas iyo adeegyadaas markaad la kulanto shaqaalaha ama ilmahaaga macalinkiisa. Ama waxaad u-qori kartaa warqad aad ku codsanayso maclumaad dheeraas ah.

Tusaalahaa soo socdaa waa waraaq aad ku warsan karto barnaamijyada iyo adeegyada qoysaska baranaya Ingiriisida.

11.Waraaq: Barnaamijyada ama Adeegyada qoysaska baranaya Ingiriisida (T)

(Taariikhda)

Gacaliye _____,
(magaca maalinka)

Qoyskayga ayaa baranaya Ingiriisida. Dugsigu ma leeyahay barnaamijyo qoysaska baranaya Ingiriisida? Wuxaan ku hadalnaa _____.
(afkaaga)

Fadlan ha na soo waco turjumaan nooga warama barnaamijyadaas. Lambarka telefonkayagu waa_____.
(telefon lambarkaaga)

Mahadsanid,

(magaacaaga)

Lifaaqyada

11. Warqadda B: Barnaamijyada ama adeegyada qoysaska baranaya Ingiriisida (Ingiriisi)

<p>Dear _____, (teacher's name)</p> <p>My family is learning English. Does the school have any programs for families learning English? We speak _____. (your language)</p> <p>Please have an interpreter call us to tell us about these programs. Our phone number is _____. (your phone number)</p> <p>Thank you,</p> <p>_____</p> <p>(your name)</p>	_____ (date)
--	-----------------